# LIFAAQA 1

## *Ogaysiiska Hab-raaca Dhawrista*

*Xeerka Horumarinta Dadka Naafada ah ee 2004 (dib u ansixinta IDEA, 2004), Kongaresku wuxuu uga baahday Waaxda Waxbarashada Maraykanka inay daabacdo si ballaadhanna u baahiso 'foomam nooca', kuwaasoo "ku habboon shuruudaha [Qaybta B ee IDEA]" "kuna filan inay buuxiyaan shuruudaha". Ogaysiiskan hab-raaca dhawrista waxa la siiyey gobolada.*

***OGOW: Farta la jiifiyey waxay muujinaysaa shuruudaha Gobolka.*** **Farta aan la jiifin ee Time Roman waxay muujinaysaa shuruucda ama xukunada dawladda dhexe.**

**Fursadda in la baadho diiwaanada; kaqaybqaadashada waalidka ee kulamada. 34 CFR §300.501**

(a) *Fursadda lagu baadhayo diiwaanada.* Waalidka ilme naafo ah waa in loo oggoladaa, iyadoo la eegayo hab-raacyada §§ 300.613 ilaa 300.621, fursad loo kormeerayo dibna loogu eegayo diiwaanada waxbarasho oo dhan marka la eego----

(1) Aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarasho ee ilmaha; iyo

(2) Siinta FAPE ilmaha.

(b)*Kaqaybqaadashada waalidka ee kulamada.*

(1) Waalidka ilme naafo ah waa loo oggolaadaa fursad uu kaga qaybqaato kulamada marka la eego---

(i) Aqoonsiga, qiiimaynta, iyo meelaynta waxbarasho ee ilmaha; iyo

(ii) Siinta FAPE ilmaha.

(2) Wakaalad dadwayne oo kasta waa inay oggolaan kartaa §300.322(a)(1) iyo (b)(1) si loo xaqiijiyo in waalidka carruurta naafada ahi uu leeyahay fursad uu kaga qaybqaato kulamada lagu sharxay baaragaraafka (b)(1) ee qaybtan.

(3) Kulan kuma jiraan wada sheekaysi aan rasmi ahayn ama aan wakhti loo qaban oo ku lug leh shaqaalaha wakaaladda dadwaynaha iyo wada sheekaysiyada arrimaha sida habka barista, qorshayaasha casharka, ama isu-duwidda bixinta adeegga. Kulan sidoo kale kuma jiraan hawlo diyaargaraw taasoo shaqaalaha wakaaladda dawladdu ay ka shaqayeeyaan si ay u soo saraaraan soojeedin ama jawaab soojeedinta waalidka kaasoo lagaga hadli doono kulamada dambe.

(c)Ku lug yeelashada waalidka ee go’aamada meelaynta*.*

(1) Wakaalad dadwayne oo kasta waa inay hubisaa in waalidka ilme kasta oo naafo ahi uu xubin ka yahay koox kasta taasoo go’aan ka qaadata meelaynta waxbarasho ee ilmaha waalidka.

(2) Dhaqan-galinta shuruudaha baaragaraaf (c)(1) ee qaybtan, wakaaladda dadwaynuhu waa inay isticmaashaa hab-raacyo waafaqsan hab-raacyada lagu sharxay §300.322(a) ilaa (b)(1).

(3) Haddii waalidba aanu kaqaybqaadan kulan kaasoo ay tahay in lagu qaato go’aan la xidhiidha meelaynta waxbarasho ee ilmahooga, wakaaladda dawladdu waa inay isticmaashaa qaabab kale si ay u xaqiijiso kaqaybqaadashadooda, oo ay kujirto tilifoonada shakhsiyeed ama shireed, ama kaga qaybgalka shirka fiidyawga.

(4) Go’aan meelayneed waxa qaadan kara koox isagoon waalidku ku lug lahayn, haddii wakaaladda dawladdu awoodi waydo inay hesho kaqaybqaadashada waalidka ee go’aanka. Kiiskan, wakaaladda dawladdu waa inay haysaa diiwaan isku daygeeda ah inay xaqiijiso ku lug yeelashadooda.

## Isgaadhsiinta Hab-raaca Dhawrista

**34 CFR §300.504**
(a) Nuqul kamida hab-raaca dhawrista ee loo heli karo waalidka ilmaha naafada ah ama *ardayga muddakarka ah ee naafada ah* waa in la siiyaa waalidka *ama ardayga muddakarka ah oo kaliya hal mar sannad dugsiyeedka,* marka laga reebo in nuqul ay sidoo kale tahay in lagu siiyo waalidka---

(1) Gudbintii hore ama codsiga waalidka ee qiimayn;
(2) Helista cabashada u horraysa ee Gobolka iyo helista hab-socodka codsiga dhagaysiga u horreeya ee la sugayo;
(3) Iyadoo la eegayo hab-raacyada anshaxa (ka eeg ***Hab-raacyada Marka La Anshax Marinayo Ilme Naafo ah,*** hoos); iyo
(4) Codsiga waalidka ama *ardayga muddakarka ah.*

*(*b) Websaaydka internetka. Qaybta *Maamulka Dugsigu (SAU) waxay* dhigi kartaa nuqul hadda ah ee ogaysiiska hab-raaca dhawrista websaaydkooda hadduu websaayd jiro.

*Meelo waalidku la xidhiidho karo si uga doono kaalmo fahamka xuquuqda waalidka waxa kamida Xafiiska Ilaalinta Xaqa ee Waaxda Waxbarashada Maine (207-624-6644), Maine parent Federation (1-800-870-7746), Xarunta Xuquuqda Naafada (1-800-452-1948) iyo Southern Maine Parent Awareness (1-800-564-9696), iyo KIDS LEGAL (1-866-624-7787).*

***Waalid wuxuu ka fayl garaysan karaa codsi muran xallin Waaxda Waxbarashada Maine haddii waalidku rumaysan yahay qaybta maamulka dugsigu (SAU) inay ku xadgudubtay shardi marka la eego Xukunka Waxbarashada Gaarka ah Maine. (ka eeg Qaybta Muran Xallinta hoos.)***

***Kaqaybqaadashada Waalidka***
*Waalidka ilme naafo ah ahaan, waxaad xaq u yeelatay inaad kaqaybqaadato kulamada la xidhiidha go'aansiga xaq u yeelashada ilmahaaga, qiimaynta hore ama dib u qiimaynta, meelaynta waxbarasho ama siinta adeegyada xilli hore ee daryeelka ee dhalashada ilaa 2 jirka ilmahaaga ama siinta waxbarashada dawladda bilaashka ah ee habboon ilmahaaga da'da 3 ilaa 20 jir. Haddaad tahay arday muddakar ah, waxaad xaq u leedahay inaad kaqaybqaadato kulamada la xidhiidha go'aansiga mutaysigaaga, qiimayn hore ama dib u qiimayn, meelaynta waxbarashada ama siinta waxbarashada dawladda bilaashka ah ee habboon.*

**OGAYSIIS QORAN**
**34 CFR §300.503**
**Ogaysiis**
Qaybta maamulka dugsigaagu (SAU) waa inay ku siiyaan ogaysiis qoran (kugu siiyaan macluumaadka qaar qoraal), *ugu yaraan 7 cisho taariikhda qaybta maamulka dugsiga:*

1. Ay soojeediso si ay u bilawdo ama u beddesho aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga, ama siinta *adeegyada daryeelka xilli hore ilmahaaga dhalashada ilaa 2 jirka,*ama waxbarashada dawladda bilaashka ah ee habboon (FAPE) *ilmahaaga 3 ilaa 20 jirka;* **ama**
2. Diido inay bilawdo ama beddesho aqoonsiga, qiimaynta, ama meelaynta waxbarasho ee ilmahaaga, ama siinta *adeegyada daryeelka xilli hore ilmahaaga dhalashada ilaa 2 jirka,* ama FAPE ilmahaaga 3 ilaa 20 jir.

**Tusmada ogaysiiska**
Ogaysiiska qorani waa inuu:

1. Sharxayaa tallaabada *la xidhiidha gudbinta, qiimaynta, aqoonsiga, barnaamijaynta ama meelaynta* taasoo SAU soojeedisay ama diiday inay qaadato;
2. Sharraxaa sababta SAU u soojeedinayaan ama u diidayaan inuu qaado tallaabo;

3. Sharraxaa hab-raac qiimayneed, diiwaangalin, ama warbixin kastaa oo SAU-daadu u isticmaaleen go'aansiga inay soojeediyaan ama diidaan tallaabada;
4. Ku daraan bayaan inaad ku leedahay ilaalin bixinta hab-raaca dhawrista ee Qaybta B ee IDEA;
5. Kuu sheegaan sidaad u heli karto sharrax ah hab-raaca dhawriseed haddii tallaabada SAU-daadu soojeedinaysaa ama diidaysaa aanay ahayn gudbin hore oo qiimayn;
6. Ku daraan khayraad aad leedahay si ay kuula soo xidhiidhaan caawimo ahaan fahamka xuquuqdaada Qaybta B ee IDEA, *sida iyo Xafiiska Xaqa Qofka ee Waaxda Waxbarashada Maine (207-624-6644), Main Parent Federation (1-800-870-7746), iyo Southern Maine Parent Awareness (1-800-564-9696)*
7. Sharxaan wixii kale doorasho ah kaasoo Kooxda barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay (IEP) ee ilmahaagu, *oo ay kujiraan* waalidka, ay tixgaliyeen iyo asbaabta doorashooyinkaas loo diiday;
8. Bixiyaan sharraxaadda asbaab kale taasoo ah sababta SAU-gaagu u soojeediyey ama u diiday tallaabada
9. *Ku daraan guudmar faallooyinka waalidka, oo ay kujiraan sharraxa waalidka ee horumarka ilmahooga; iyo*
10. *Magacyada iyo jagada xubin kasta.*

**Ku ogaysiin luuqad la fahmi karo**

Ogaysiisku waa inuu:

1. Ku qornaadaa luuqad ay fahmi karaan dadka caadiga ahi; **iyo**
2. Lagugu siiyaa luuqaddaada ama nooc xidhiidh oo kale ood isticmaasho, ilaa ay caddaato inaan sidaa la samayn karayn.

Haddii luuqaddaadu ama nooca xidhiidhkaaga ee kale aanu qornayn, SAU-gaagu waa inay hubiyaan in:

1. Ogaysiiska laguugu tarjumay hadal ahaan qaabab kale ee luuqaddaada ama noocaaga kale ee xidhiidhka;
2. Aad fahamtay ogaysiiska; **iyo**
3. Uu jiraa caddayn qoran taasoo 1 iyo 2 la buuxiyey.

**Afka Hooyo**
**34 CFR §300.29**

Afka hooyo, marki loo adeegsado shaqsi aan si fiican u aqoonin luuqada Ingiriiska, macnaheedu waxa weeye kudaridda nidaamka dhowritaanka:

1. Luuqadda uu caadi ahaan isticmaalo qofkaasi, ama, marka ilmaha, luuqadda uu caadi ahaan isticmaalo waalidka ilmuhu;
2. Dhammaan la xidhiidhka tooska ah ee ilmaha (oo ay kujiraan qiimaynta ilmaha), luuqadda uu caadi ahaan isticmaalo ilmuhu guriga ama bey'adda barasho.

Qof dhago la' ama indho la', qof aan lahayn luuqad qoran, nooca xidhiidhku waa waxa qofku caadi ahaan isticmaalo (sida ku xidhiidhka luuqadda calaamadda, farta indhoolaha, ama hadalka).

**Warqadda elektarooniga ah**
**34 CFR §300.505**

Hadii SAU-daadu ay siiso waalidinta fursadda ah in ay dokumintiyada kuhelaan qaab imeeyl ah ayna qaadaan talaabada kuhaboon si loo xaqiijiyo iney amaan tahay in la ilaaliyo nidaamka dhowritaanka,waxaad dooran kartaa in aad hesho kuwaan soo socda qaab imeeyl ahaan:

1-Wargelin qoran

2-wargelin nidaamka dhowritaanka
3-Wargelin sii horeysa
4-IEP;
5-Warbixinno kusaabsan hormarka; **IYO**
6-Wargelimo la xariira dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista

**Oggolaanshaha Waalidka – Qeexdin**
**34 CFR §300.9**
**Oggolaansho**
Oggolaansho waxay ka dhigan tahay in:
1. Si buuxda laguugu wargeliyey luuqaddaada ama nooc xidhiidh oo kale (sida ku xidhiidhka luuqadda calaamadda, farta indhoolaha, ama hadal) dhammaan macluumaadka kusaabsan tallaabada aad oggolaanshaha ka bixinayso.
2. Aad fahamtahay ood ku oggolaatay qoraal tallaabadaas, oggolaanshuna wuxuu sharxaa tallaabadaas waxaanu taxaa diiwaanada (hadday jiraan) la fasixi doono iyo cidda loo fasixi doono; **iyo**
3. Aad fahamtay in oggolaanshuhu uu ahaa iskaa qaybtaada aanad ka bixi karto oggolaanshahaaga wakhti kasta.

Ka bixistaada oggolaanshuhu diidi maayo (ka-noqod) tallaabo dhacday kadib markaad bixisay oggolaanshahaaga iyo kahor intaad ka baxday.

Hadduu waalidku kaga noqdo qoraal oggolaanshaha helista adeegyada gaarka ah ee ilmihiisa kadib markii ilmaha bilawgii la siiyey waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, wakaaladda dawladda loogama baahna inay beddesho diiwaanada waxbarasho ee ilmaha si ay u tirtirto wixii tixraac u ah helista ilmaha ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kanoqoshada oggolaanshaha dartii.

**Oggolaansha Waalidka**
**34 CFR §300.300**
**Oggolaanshaha qiimaynta hore**
SAU-daadu ma fulin karaan qiimayn hore ee ilmahaaga si ay u go'aansadaan haddii ilmahaagu mutaystay marka la eego Qaybta B ee IDEA si uu u helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha iyagoon marka hore aan ku siin ogaysiis qoran ee tallaabada la soojeediyey iyo helis la'aanta oggolaanshahaaga oo qoran sida ku cad hoosta ciwaanka **Oggolaanshaha Waalidka.**

SAU-daadu waa inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u helaan oggolaanshahaaga ee qiimayn hore si loo go'aansado haddii ilmahaagu yahay naafo.

Oggolaanshahaaga qiimaynta hore kama dhigna in sidoo kale aad siisay oggolaanshahaaga SAU si ay u bilaabaan siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga. Haddii ilmahaaga la qoray dugsi dawladeed ama aad raadinayso inaad qorto ilmahaaga dugsi dawladeed aanad diiday inaad bixiso oggolaansho aanad ka jawaabi wayday codsi ah inaad bixiso oggolaansho qiimayn hore, SAU-daadu way samayn kartaa, laakiin looma baahna, inay raadiyaan si ay u fuliyaan qiimayn hore ee ilmahaaga iyagoo ka faa'idaysanaya dhexdhexaadinta Xeerka *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka, kulanka xalka, hab-raaca dhagaysiyada xaqa qofka ee caddaaladda ah (ilaa looga baahdo inay sidaas sameeyaan ama lagaga mamnuucay samaynta sidaas sharciga Gobolka). SAU-daadu ku xadgudbi maayaan waajibaadka ka saaran inay meeleeyaan, gartaan oo qiimeeyaan ilmahaaga haddii aanay kujirin qiimaynta duruufahan ee ilmahaaga, ilaa sharciga dawladdu uga baahdo inay sameeyaan qiimaynta.

*Guud ahaan, labada waalid midkood ayaa dammaanad-qaadi kara oggolaansho. Marka waalidku isfureen ee ay wadaagaan xuquuqda iyo masuuliyadda waalidnimo labada midkood ayaa oggolaansho dammaanad-qaadi kara. Si kastaa, markay dhacdo in hal waalid oggolaansho dammaan-qaado ka kalena diido, qaybta maamulka dugsiga ayaa lagu waajibiyey inay bilaabaan tallaabada oggolaanshaha lagu dammaanad –qaadayo.*

**Qawaaniinta gaarka ah ee qiimaynta hore ee kafaalo-qaadka Gobolka**
Haddii ilme uu Gobolku ka masuul yahay oo aanu la noolayn waalidkii---
SAU ugama baahna oggolaansho waalidkii qiimaynta hore si ay u go'aansadaan haddii ilmuhu yahay naafo haddii:

1. Inkastoo ay jiraan dadaalo macquul ah si sidaas loo sameeyo, SAU aanay heli karin waalidka ilmaha;
2. Xuquuqda waalidka la joojiyey iyadoo la eegayo sharciga Gobolka; **ama**
3. Qaadi uu u xilsaaray xaqa lagu qaadanayo go'aan waxbarasho laguna oggolaanayo qiimaynta hore qof aan ahayn waalidka.

Ka masuul noqoshada Gobolka, sida laga isticmaalo IDEA, waxay ka dhigan tahay ilme kaasoo, sida uu go'aamiyey Gobolku halka ilmuhu ku nool yahay:

1. Ilme la koriyo;
2. Loo tixgaliyo kafaalo-qaadka Gobolka marka la eego sharciga Gobolka; **ama**
3. Kujira haynta wakaaladda daryeelka ilmaha dawladda.

**Oggolaansha waalidka ee adeegyada**
SAU-daadu waa inay heshaa oggolaanshaaga wargelinta oo qoran kahor siinta waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha marka u horraysa.
SAU waa inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u helaan oggolaanshaha warka qaba kahor siinta waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmahaaga markii u horraysey.

Haddaanad ka jawaabin codsi si aad u siiso oggolaanshahaaga ilmahaagu si uu u helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha markii u horraysay, ama haddaad diido inaan bixiso oggolaanshahan, SAU-daadu waxa dhici karta inayna isticmaalin hab-raac dhawrista (sida, dhexdhexaadin, cabashada Gobolka, kulanka xalka, ama dhagaysi xaqa qofka oo caddaalad ah) si aad u hesho heshiis ama xukumid in waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha (sida ay ku taliyeen Kooxda IEP-da ilmahaagu) waxa dhici karta in la siiyo ilmahaaga adoon oggolaan.

Haddaad diido inaad siiso oggolaanshahaaga in ilmahaagu helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha markii u horraysay, ama haddaanad ka jawaabin codsi inaad bixiso oggolaansho noocan ah oo SAU-na aanay siin ilmahaaga waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha kaasoo ay u raadinyeen oggolaanshaaga, SAU-daadu:

1. Kuma xadgudbayaan shuruudda ah inay *bixiyaan adeegyo habboon(ee ilme dhalashada ilaa 2 jir) ama loo dhigo waxbarasho dawladeed bilaash ah oo habboon (*FAPE) inuu helo ilmahaagu *(da'da 3 ilaa 20 jir) hadduu siin waayo adeegyadan ilmahaaga;* ***iyo***

2. Loogama baahna inay qabtaan kulkan barnaamijka waxbarashada khaarka ah (IEP) ama ay u soo saaraan IEP ilmahaaga waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha dartood kuwaasoo oggolaanshaaga loo codsaday.

**Oggolaanshaha waalidka ee dib u qiimaynaha**
SAU-daadu waa inay helaan oggolaanshahaaga warka qaba kahor intayna mar kale qiimayn ilmahaaga, ilaa SAU-daadu ay muujin karto in:

1. Ay qaaday tallaabooyin macquul ah si ay u hesho oggolaanshaaga dib u qiimaynta ilmahaaga; **iyo**
2. Aanad u jawaabin

Haddaad diido inaad oggolaato dib u qiimaynta ilmahaaga, SAU samayn kartaa, laakiin loogama baahna inay samayaan dib u qiimaynta ilmahaaga iyagoo isticmaalaya dhexdhexaadin, kulan xallin, hab-raaca dhagaysiga xaqa qofka oo caddaalad ah si aad u raadiso inaad beddesho diidmadaadii si aad ugu oggolaato ilmahaaga dib u qiimayn. Sidii qiimayntii hore, SAU-daadu kuma xadgudbayaan waajibaadkooda marka la eego Qaybta B ee IDEA hadday ku joojiyaan inay u sameeyaan dib u qiimaynta qaabkan.

**Caddaymaha dadaal macquul ah si loo helo oggolaansha waalidka**
Dugsigaagu waa inuu ilaaliyaa caddaymaha qoran ee dadaal macquul ah si loo helo oggolaanshaha waalidka qiimaynta hore, si loo siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii u horraysey, si dib loogu qiimeeyo looguna meelayo waalidka gacan ku haynta Gobolka qiimaynta hore.
Caddaymaha qoran waa inay kujiraan diiwaan ah isku dayada SAU meelahan, sida:
1. Diiwaanka faahfaahsan ee tilifoonada dhacay ee la sameeyey ama la isku dayey iyo natiijada tilifoonadan;
2. Nuqulada waraaqo waalidka loo diray iyo wixii jawaab laga helay; **iyo**
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka lagu sameeyey guriga waalidka ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkan.

**Shuruudaha oggolaanshaha ee kale**
Oggolaanshaaga looma baahna kahor SAU-taadu waxa dhici karta inay:
1. Dib u eegaan macluumaadka jira kaqayb ahaan qiimaynta ama dib u qiimaynta ilmhaaga; **ama**
2. Siiyaan ilmahaaga baadhis ama qiimayn kale taasoo la siiyo carruurta kale oo dhan ilamaa, kahor baadhistaas ama qiimayntaas, oggolaansho looga baahan yahay waalidka carruurta oo dhan.

**Naqtiimidda Oggolaanshaha Waalidka Diisambar 31, 2008:**
**Oggolaansha waalidka §300.300.**
1. Haddii waalidka ilmee ka jawaabi waayo codsi, ama diido inuu oggolaado, siinta hore ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, wakaaladda dawladdu-
   a. Waxa dhici karta inayna isticmaalin hab-raacyada qayb hoosaad E ee qaybtan (oo ay kujiraan hab-raacyada dhexdhexaadinta marka la eego §300.506 ama hab-raacyada xaqa qofka marka la eego §§300.507 ilaa 300.516) si ay u helaan heshiis ama xukun in adeegyada la siin karo ilmaha;
   b. Aan loo tixgalin doonin inay ku xadgudubtay shuruudda si loo siiyo FAPE ilmaha sababtoo ah lama siin ilmaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kuwaasoo waalidku diiday ama bixin waayey oggolaansho; iyo
   c. Loogama baahna inay kaqaybgasho kulanka Kooxda IEP ama soosaaro IEP marka la eego §§300.320 iyo 300.324 ee ilmaha.

2. Haddii, wakhti uun ku xiga siinta hore oo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, waalidka ilmuhu kaga noqdo oggolaanshaha qoraal sii wadista siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, wakaaladda dawladdu-
   a. Waxa dhici karta inayna sii wadin siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha ilmaha, laakiin waa inay bixisaa ogaysiis qoran oo hore iyadoo la eegayo §300.503 kahor joojinta siinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha;

b. Waxa dhici karta inayna isticmaalin hab-raacyada koox hoosaad E ee qaybtan (oo ay kujiraan hab-raaca dhexdhexaadinta marka la eego §300.506 ama hab-raaca xaqa qofka marka la eego §§300.507 ilaa 300.516) si ay u hesho heshiis ama xukun in siin karo adeegyada ilmahaga
c. U tixgalin mayso ku xadgudub shuruudda hadday uga dhigto FAPE ilmaha inuu heli karo sababtoo ah waxa lasiin waayey ilmaha waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha oo gaar ah; iyo
d. Loogama baahna inay kaqaybgasho kulan Kooxda IEP ama ku soosaarto IEP §§300.320 iyo 300.324 ee ilmaha ee siinta dheeraadka ah ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

**Qiimaynaha Waxbarasho ee Madaxabannaan**
**34 CFR §300.502**
**Guud**
Sida hoos ku sharraxan, waxaad xaq u leedahay inaad *codsato* qiimaynta waxbarasho oo madaxbannaan (IEE) ee ilmahaaga *iyadoo bilaash kuu ah* haddaad diiday qiimaynta ilmahaaga taasoo laga helay SAU-daada.

Haddaad codsato qiimaynta waxbarashada madaxabannaan, SAU waa inay ku siisaa macluumaadka meesha aad ka heli karto qiimaynta waxbarasho oo madaxbannaan iyo shuruudaha uga yaal SAU qiimaynta waxbarashada madaxabannaan.

**Qeexdimo**
Qiimaynta waxbarashada madaxabannaan waxay ka dhigan tahay qiimaynta ay fuliyaan baadhayaal xirfad sare leh kuwaasoo aan u shaqayn SAU-aada ka masuulka ah waxbarashada ilmahaaga.

Kharashka dawladdu wuxuu ka dhigan yahay in SAU ay mid ahaan bixiso kharashka qiimaynta oo dhan ama hubiso in qiimaynta lagugu siinayo bilaash, oo waafaqsan siinaha Qaybta B ee IDEA, kuwaasoo u oggolaanaya Gobol kastaa inuu isticmaalo meelo taageero oo kasta oo Goboleed, xaafadeed, Dawladda Dhexe gaar oo ka jira Gobolka si uu u buuxiyo shuruudaha Qaybta B ee Xeerka.

**Xaqa waalidka ee ku qiimaynta kharashka dawladda**
Waxaad xaq ugu leedahay qiimaynta waxbarasho ee madaxabannaan ee ilmahaaga kharashka dawladda haddaa diiday qiimayn ilmahaagu ka helay SAU-daada, waxa ku xidhan xaaladahan soo socda:

1. Haddaad codsato qiimaynta waxbarasho oo madaxbannaan ilmahaaga kharash dawladda markaad diiday qiimaynta dugsiga ee ilmahaaga, SAU-daadu waa inay, *30 cisho gudahood,* **mid ahaan:** (a) Fayl garaysaa codsiga dhagaysiga xaq qofka si aad u codsato dhagaysi si aad u muujiso in qiimaytiisa ilmahaagu inay habboon tahay; **ama** (b) Xaqiijisaa in qiimaynta waxbarashada ee madaxabannaani lagu bixinayo kharashka dawladda,ilaa SAU ay muujiyaan dhagaysi in qiimaynta ilmahaagu ee aad heshay aanay buuxin shuruudaha SAU.
2. Haddii SAU-daadu codsato dhagaysi oo go'aanka u dambeeyaana yahay in qiimayntaada SAU ee ilmahaagu ay habboon tahay, waxaad wali xaq u leedahay qiimaynta waxbarashada madaxabannaan, laakiin kharashka dawladdu ma bixinayso.
3. Haddaad codsato qiimaynta waxbarasho madaxbannaan ee ilmahaaga, SAU waxay waydiin kartaa waxaad u diidayso qiimaynta ilmahaaga ka helay SAU-daada. Si kastaba, SAU-daadu waxa dhici karta inayna u baahan sharraxaad waxana dhici kara inayna dib ula dhicin mid ahaan siinta ilmahaaga qiimaynta waxbarashada madaxabannaan oo

kharashka dawladdu bixinayso ama buuxinta *codsi dhagaysi* xaqa qofka si aad u codsato dhagaysi xaqa qofka si aad u difaacdo qiimaynta SAU ee ilmahaaga.

Waxaad xaq u leedahay hal qiimaynta waxbarashada madaxabannaan ah ee ilmahaaga oo kharashku dawladdu bixinayso xilli kasta SAU-daadu ay fuliso qiimayn ilmahaaga ah taasoo aad diiday.

**Qiimaynta waalidku bilaabay**
Haddaad ku heshay qiimayn waxbarashada madaxabannaan ee ilmahaaga kharashka dawladda ama aad la wadaagto SAU-daada qiimayn ilmahaaga ah taasoo aad ku heshay kharash gaar ah:

1. SAU-daadu waa inay tixgalisaa natiijooyinka qiimaynta ilmahaaga, hadday buuxiso shuruudda SAU ee qiimaynta waxbarashada madaxabannaan, go'aan kasta oo la qaaday iyadoo la eegayo siinta waxbarasho dawladeed bilaash ah oo habboon (FAPE) ilmahaaga; **iyo**
2. Adigu ama SAU-daadu waxaad keeni kartaan qiimaynta caddayn ahaan dhagaysi xaqa qofka oo la xidhiidha ilmahaaga.

**Codsiyada qiimaynaha ee saraakiisha dhagaysiga**
Haddii sarkaal dhagaysi uu codsado qiimaynta waxbarasho madaxbannaan ee ilmahaaga kaqayb ahaan dhagaysiga xaqa qofka, kharashka qiimayntu waa inuu noqdaa ka dawladda.

**Shuruudaha SAU**
Haddii qiimaynta waxbarasho madaxbannaan ay dawladdu lacagta bixinayo, shuruudda lagu helay qiimayntu, ooy kujirto goobta qiimayntu iyo heerka aqoonta baadhaha, waa inuu la mid noqdaa sida shuruudaha SAU isticmaasho markay bilaabayaan qiimayn (ilaa xadka shuruudahani ay waafaqsan yihiin xaqaaaga qiimaynta waxbarasho madaxbannaan).

Marka laga tago shuruudaha sare ku sharraxan, SAU waxa dhici karta inay ku xidhaan xaalado ama wakhti la xidhiidha ku helista qiimaynta waxbarasho madaxbannaan kharashka dawladda.

**Qarsoonaanta Macluumaadka**
**Qeexdimo**
**34 CFR §300.611**
Sida lagu isticmaalay hoost ciwaanka **Qarsoonaanta Macluumaadka**:

- Burbur wuxuu ka dhigan yahay burbur muuqda ka baabiinta waxyaabaha qofka lagu garano macluumaadka sidaa darteed macluumaadka qofka leh la garan maayo
- Diiwaanada waxbarashada waxay ka dhigan tahay nooca diiwaanada lagu sheegay qeexdinta "diiwaanada waxbarasho" ee 34 CFR Part 99 (Qawaaniintu waxay fulinayaan Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyks iyo Gaaryeelidda ee 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- Wakaaladda kaqaybqaadashadu waxay ka dhigan tahay SAU, wakaalad ama machad kasta kaasoo ururiya, haya, ama isticmaala macluumaad cidda leh la garan karo, ama kaasoo macluumaad lagaga helay, Qaybta B ee IDEA

**Shakhsi Ahaan La Garan Karo**
**34 CFR §300.32**
Shakhsi ahaan la garan karo waxay ka dhigan tahay macluumaad leh:
(a) Magaca ilmahaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca xubin kale oo qoys;
(b) Ciwaanka ilmahaaga;

(c) Waxa qof laga aqoonsado, sida lambarka sooshiyaal sikiyuuritiga ilmahaaga ama lambarka ardayga; **ama**
(d) Liis ah sifooyinka qofka ama macluumaad kale oo suurogal ka dhigaya in la aqoonsado ilmahaaga ilaa heer macquul ah.

**Ogaysiis Kusocda Waalidka**
**34 CFR §300.612**
Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay siisaa ogaysiis ku filan inuu si buuxda ugu wargeliyo waalidka qarsoonaanta macluumaadka qofka lagu garan karo, ooy kamid yihiin:

1. Sharraxaad ilaa xadka ogaysiiska lagu bixiyey luuqaddooda hooyo ee kooxa dadka kaladuwan ee Gobolka;
2. Sharraxaad carruurta macluumaadka qofka lagu garto laga hayo, noocyada macluumaadka la raadiyano, hababka Gobolku ugu talogalay inuu u isticmaalo ururinta macluumaadka (ooy kujiraan meesha macluumaadka laga helay), isticmaalada lagu samaynayo macluumaadka;
3. Guudmarka siyaasadaha iyo hab-raacyada kuwaas wakaaladaha kaqaybta ahi ay tahay inay raacaan ee la xidhiidha kaydinta, tusidda cid saddexaad, haynta, iyo burburinta macluumaadka shakhsiga lagu garto; **iyo**
4. Sharrxaad dhammaan xuquuqda waalidka iyo carruurta ee la xidhiidha macluumaadkan, oo ay kujiraan xuquuqaha hoosta taga Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo qawaaniintiisa fulineed ee 34 CFR Part 99.

Kahor wixii aqoonsi, abaarid, ama qiimayn wayn ah (sidoo kale loo yaqaan “helista ilmaha”), ogaysiiska waa in loogu daabacaa ama loogu sheegaa jaraa’idka ama warbaahinta kale, ama labadaba, si leh wareeg ku filan inuu ogaado waalidku Gobolka oo dhan ee hawsha si loo abaaro, loo garto, loona qiimeeyo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha.

**Xuquuqda Helista**
**34 CFR §300.613**
Wakaaladda kaqaybta ahi waa inay kuu oggolaataa inaad kormeerto dibna u eego wixii diiwaan waxbarasho ee la xidhiidha ilmahaaga kuwaasoo la soo ururiyey, hayey, ama ay ku isticmaaleen SAU-daadu Qaybta B ee IDEA. Wakaaladda kaqaybta ahi waa inay aqbashadaa codsigaaga ah inaad kormeerto ood dib u eego wixii diiwaan waxbarasho kusaabsan ilmahaaga iydoon dib u dhac aan loo baahayn iman iyo kahor wixii kulan la xidhiidha barnaamijka waxbarashada la khaas yeelay (IEP), ama wixii dhagaysi xaqa qofka oo caddaalad ah (oo ay kujiraan kulan xallin ama dhagaysi la xidhiidha anshax), kiisna kama badna 45 cisho kadib markaad samaysay codsi.

Xaqa aad u leedahay inaad kormeerto ood dib u eegto diiwaanada waxarashada waxa kamida:

1. Xaqa aad u leedahay jawaab katimi wakaaladda kaqaybta ah codsigaaga macquulka ah ee sharraxaado iyo tarjumaado diiwaanada;
2. Xaqa aad u leedahay inaad codsato in wakaaladda kaqaybta ahi bixiso nuqulo diiwaanada ah haddaanad si waxtar leh u kormeeri karin dibna ugu eegi kari diiwaanada ilaa aad hesho nuquladaas; **iyo**
3. Xaqa aad u leedahay in wakiilkaagu kormeero dibna u eego diiwaanada.

Wakaalada kaqaybta ahi waxa dhici karta inay sii ogayd inaad awood u leedahay inaad kormeero ood dib u eegto diiwaanada la xidhiidha ilmahaaga ilaa lagugula taliyo inaanad awood u lahay marka la eego sharciga Gobolka ee khuseeya ee xukuma arrimahan oo kale wakiilnimo, ama kala tag iyo furriin (nin iyo naagtii).

**Diiwaanka Helista**
**34 CFR §300.614**
Wakaalad kaqayb ah oo kastaa waa inay haysataa diiwaan cidaha helaysta helista diiwaanada waxbarashada la soo ururiyey, la hayey, ama lagu isticmaalay hoosta Qaybta B ee IDEA (laga reebo helista waalidka iyo shaqaalaha awoodda loo siiyey ee wakaaladda kaqaybta ah), ooy kujiraan magaca cidda, taariikhda helista la siiyey, iyo ujeedaha cidda loogu oggolaaday inay isticmaasho diiwaanada.

**Diiwaanada Wax Kabadan Hal Ilme**
**34 CFR §300.615**
Haddii wixii diiwaan waxbarasho ay kujirto macluumaad hal ilme wax kabadan, waalidka carruurtani waxay xaq u leeyihiin inay kormeeraan dibna u eegaan kaliya macluumadka la xidhiidha ilmahooga ama lagu wargeliyo macluumaadkaas gaarka ah.

**Liiska Noocyada iyo Goobaha Macluumaadka**
**34 CFR §300.616**
Codsi ahaan, wakaalad kaqayb ah oo kastaa waa inay ku siisa liiska noocyada iyo goobaha diiwaanada waxbarashada la ururiyey, la hayey, ama ay isticmaashay wakaaladdu.

**Lacagta Adeegga**
**34 CFR §300.617**
Wakaalad kasta oo kaqayb ahi waxay ku qaadi kartaa lacag nuqulada diiwaanada laguu samaynayo Qaybta B ee IDEA, haddii lacagtu aanay kaa horjoogsanayn inaad hesho xaqaaga aad ku kormeerayso dibna ugu eegayso diiwaanadaas.

Wakaalad kaqayb ahi waxa dhici karta inayna lacag kaa qaadin si ay kuugu raadiso ama kuugu soo saarto macluumaad marka la eego Qaybta B ee IDEA.

**Wax Kaga Beddelka Diiwaanada Codsiga Waalidka**
**34 CFR §300.618**
Haddaad rumaysan in macluumaad kujirta diiwaanada waxbarashada oo la xidhiidha ilmahaaga ee la soo ururiyey, la hayey, ama la isticmaalay marka la eego Qaybta B ee IDEA inayna sax ahayn, marin habaw tahay, ama ku xadgudbayso gaar yeelidda ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga, waxaad ka codsan kartaa wakaaladda kaqaybta ee haysa macluumaadka inay beddesho macluumaadka.

Wakaaladda kaqaybta ahi waa inay go'aansataa in lagu beddelo macluumaadka marka la eego codsigaaga wakhti macquula ee helista codsigaaga.

Haddii wakaaladda kaqaybta ahi diido inay beddesho macluumaadka marka la eego codsigaaga, waa inay kugu wargelisaa diidmada kuguna talisaa xaqa dhagaysiga ujeedadan sida ku sharraxan hoosta ciwaanka **fursadda dhagaysi**, *ee hoose.*

**Fursadda Dhagaysi**
**34 CFR §300.619**
Wakaaladda kaqaybta ahi waa inay, codsi ahaan, ku siisaa fursad dhagaysi si aad uga hortimaad macluumaadka diiwaanada waxbarashada la xidhiidha ilmahaaga si aad u xaqiijiso inayna ahayn qalad, marin habaabin, ama haddii kale ku xadgudub gaaryeelidda ama xuquuqaha kale ee ilmaha.

**Hab-raacyada Dhagaysiga**
**34 CFR §300.621**
Dhagaysi in laga horyimaad macluumaadka diiwaanada waxbarashada waa in la fuliyaa iyadoo la eegayo hab-raacyada dhagaysigan oo kale ee ku hoos jira Xeerka Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Gaaryeelidda (FERPA).

**Natiijada Dhagaysiga**
**34 CFR §300.620**
Haddii, dhagaysiga dartii, wakaaladda kaqaybta ahi go'aansato in macluumaadku yahay khalad, marin habaabin ama haddii kale ku xadgudub gaaryeelidda ama xuquuqaha kale ee ilmaha, waa inay beddeshaa macluumaadka sida habboon qoraalna kugu wargelisaa. Haddii, dhagaysiga dartii, wakaaladda kaqaybta ahi go'aansato in macluumaadku aanu ahayn khalad, marin habaabin, ama haddii kale ku xadgudub gaaryeelidda ama xuquuqaha kale ee ilmaha, waa inay kugu wargelisa xaqaaga inaad dhigto diiwaanada ay ilmahaaga ka hayso bayaan ka hadlaya macluumaadka ama bixiynaya sabab kastood aad ugu diidan tahay go'aanka wakaaladda kaqaybta ah.

Sharraxaadda noocan ee la dhigayo diiwaanada ilmahaagu waa inay:
1. Haysaa wakaaladda kaqaybta ahi kaqayb ahaan diiwaanada ilmahaaga ilaa iyo inta diiwaanada ama qaybta la diidayo ay hayso wakaaladda kaqaybta ahi; **iyo**
2. Haddii wakaaladda kaqaybta ahi ay tusto diiwaanada ilmahaaga ama qaybta la diidan yahay cid uun, sharraxaadda waa in sidoo kale la tusaa ciddaas.

**Oggolaanshaha Shaacinta Macluumaadka Qofka lagu Garanayo**
**34 CFR §300.622**
Ilaa macluumaadku kujiro diiwaanada waxbarashada, shaacintana lagu ansixiyey oggolaanshaha waalidka la'aantiis Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaaryeelidda (FERPA),oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor intaan la tusin cidda kale macluumaadka qofka lagu garan karo ka sokow saraakiisha wakaaladaha kaqaybta ah. Laga reebo inta lagu jiro duruufaha hoos ku cad, oggolaanshahaaga looma baahna kahor intaan loogu fasixin macluumaadka qofka lagu garan karo saraakiisha wakaaladaha kaqaybta ah ujeedoon ah buuxinta shuruudda Qaybta B ee IDEA.

Oggolaanshahaaga, ama oggolaanshaha ilme mutaystay oo gaadhay *18 jir (la xorreeyey)* sharciga Gobolka sida uu dhigayo, waa in la helaa intaan macluumaadka qofka lagu garan karo aan loo fasixin saraakiisha wakaaladaha kaqaybta ah iyagoo bixinaya adeegyada kala-guurka.

Haddii ilmahaagu ku sugan yahay, ama rabo inuu aado, dugsi gaar ah oon ku oolin SAU-da aad deggen tahay, oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor intaan lagu fasixin wax macluumaadka qofka lagu garan karo ah ee ilmahaaga dhexda saraakiisha SAU-da dugsiga gaarka ahi kuyaal iyo saraakiisha SAU-da aad deggen tahay.

**Dhawrisyo**
**34 CFR §300.623**
Wakaalad kasta oo ka qayb ah waa inay ilaalisaa qarsoonaanta macluumaadka qofka lagu garan karo marxaladaha ururinta, kaydinta, shaacinta, iyo tirtiridda.

Hal sarkaal wakaalad kaqayb ah oo kasta waa inuu qaadaa masuuliyadda hubita qarsoonaanta wixii macluumaadka qofka lagu garan karo.

Dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka qofka lagu garan karo waa inay helaan tabobar ama barid la xidhiidha siyaasadaha iyo hab-raacyada Gobolkaaga la xidhiidha qarsoonaanta marka la eego Qaybta B ee IDEA iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Gaaryeelidda (FERPA).

Wakaalad kaqayb ah oo kastaa waa inay u haysaa, kormeerista dadwaynaha, magacyada hadda qoran iyo mansabyada shaqaalaha wakaaladda kuwaas oo laga yaabo inay helaan macluumaadka qofka lagu garan karo.

**Burburinta Macluumaadka**
**34 CFR §300.624**

SAU-daadu waa inay kugu wargelisaa marka macluumaadka qofka lagu garan karo ee la ururiyey, hayo, ama la isticmaalay aan loo sii baahnayn in lagu siiyo adeegyo waxbarasho ilmahaaga.

Macluumaadka waa in lagu burburiyaa codsigaaga. Si kastaba, diiwaan daa'im ah oo ah magaca, ciwaanka, iyo lambarka tilifoonka, fasalka, diiwaaanka xaadirista, xiisadaha uu joogay, fasalada uu dhammaystay, iyo sannadka u dhammaaday ee ilmahaaga waxa dhici karta in la siiyo wiligoodba.

**Xallinta Muranka**
***20-A M.R.S.A. §7202 et seq.***
***Hab-raaca Cabashada Gobolka***

Faraqa u dhexee dhexeeya Dhagaysiga Xaqa Qofka iyo Hab-raaca Cabashada Gobolka Qawaaniinta Qaybta B ee IDEA wuxuu sheegaa hab-raacyada kala soocan ee cabashada Gobolka iyo dhagaysiga xaqa qofka. *Maine waxay u isticmaashaa habka muran xalinta Qaybta B carruurta loogu adeegay Qaybta C.* Sida hoos ku sharraxan, qof ama urur kasta wuxuu fayl garaysan karaa cabasho Gobol oo ku eedaynaysa SAU ku xadgudub wax kamida shuruudda Qaybta B, Wakaaladda Waxbarashada Gobolka, ama wixii kale wakaalad dawladeed ah. Kaliya adiga ama SAU ayaa fayl garaysan kara *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka oo kusaabsan arrin kasta oo la xidhiidha soojeedin ama diidid inay bilawdo ama beddesho aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ilme naafo ah, ama siinta *adeegyada ku habboon (dhalasho ilaa 2 sano) ama* waxbarasho dawladeed bilaasha ah oo habboon (FAPE) ee ilme (*3 ilaa 20 jir.)* halka shaqaalaha Wakaaladda Waxbarashada Gobolku sida qaalibka ah ay tahay inay xalliso cabasho Gobol wakhti 60 cisho gudahood ah, ilaa wakhtiga si sax ah loo fidiyey, sarkaal caadil ah oo dhagaysiga xaqa qofka waa inuu dhagaystaa *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka (haddaan lagu xallin kulan xallineed ama dhexdhexaadin) oo uu ku soosaaro go'aan qoran 45 cisho gudahood kadib dhammaadka wakhtiga xalka, sida ku sharraxan dokumentigan ka hooseeya ciwaanka Hab-socodka Xalka, ilaa sarkaalka dhagaysigu uu dammaanadqaado fidin cayiman oo wakhtiga codsigaaga ama codsiga SAU. Cabashada gobolku, xalka, iyo hab-raacyada dhagaysiga xaqa qofka waxa aad loogu sharxay hoos.

**La Qabsiga Hab-raaca Cabashada Gobollka**
**34 CFR §300.151**
**Guud**

Wakaalad Waxbarasho Gobol oo kastaa waa inay lahaataa hab-raacyo qoran oo loogu talogalay:

1. Xallinta wixii cabasho ah, ooy kujiraan cabasho uu soo buuxiyey urur ama ka yimi Gobol kale;
2. Si ballaadhan loo gaadhsiiyo hab-raacyada cabashada Gobolka waalidka iyo dadka kale ee danaynaya, ooy kujiraan xarumaha tabobarka iyo macluumaadka ee waalidka,

wakaaladaha ilaalinta iyo u doodista, xarumaha noolaanshaha madaxabannaan, iyo intitiyada kale ee habboon.

**Xalalka diidmada adeegyada habboon**
Xallinta cabashada Gobolka ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolku ay ogaatay ku hoobasho siinta adeegyo habboon, Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay sheegtaa:

1. Ku hoobashada bixinta adeegyada habboon, ooy kujiraan tallaabo sixis ah oo ku habboon in la sheego baahiyaha ilmaha; **iyo**
2. Siin habboon ee adeegyada mustaqbalka ee dhammaan carruurta naafada ah.

**Hab-raacyada Cabashada Gobolka ee ugu Yar**
**34 CFR §300.152**
**Wakhti xadaysab; hab-raacyada ugu yar**
Wakaaladda Waxbarashada Gobolka oo Dhammi waa inay ku dartaa hab-raacyada cabashada Gobolka wakhti xadaysan ah 60 cisho kadib markii cabasho la fayl gareeyey si ay:

1. U fuliso baadhis goobta ah oo madaxbannaan, haddii Wakaaladda Waxbarashada Gobolku ay go'aamiso in baadhistu lama huraan tahay;
2. U siiso cawdaha fursadda uu ku gudbinayo macluumaad dheeraad ah, mid uun af ama qoraal, oo kusaabsan eedayamaha cabashada kujira;
3. U siiso SAU ama wakaaladda kale ee dawladda fursad uga jawaabto cabashada , ooy kujirto, ugu yaraan: (a) ikhtiyaarka wakaaladda, soojeedin si loo xalliyo cabashada; **iyo** (b) fursad waalid fayl gareeyey cabasho iyo in wakaaladu si iskaa ah ula qaadato si ay u gasho dhexdhexaad;
4. Dib ugu eegto macluumaadka ku tacaluqa oo dhan ugana qaadato go'aan madaxbannaan bal haddii SAU ama wakaalad dawladeed oo kale ku xadgudbayso shuruud Qaybta B ee IDEA; **iyo**
5. Ugu soo saarto go'aan qoran cawdaha kaasoo tilmaamaya eedayn kasta oo kujirta cabashada kuna jirto: (a) helitaanada xaqiiqda iyo gunaanadka: **iyo** (b) asbaabta go'aanka u dambeeya ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolka

**Fidin wakhtiya; go'aanka u dambeeya; fulin**
Hab-raacyada Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ee sare ku sharraxan sidoo kale waa inay:

1. Oggolaanayaan ka dheeraynta wakhtiga 60 cisho ah haddii oo kaliya: (a) duruufo ka reebani ay jiraan marka la eego cabasho Gobol oo gaar ah, **ama** (b) waalidka iyo SAU ama wakaaladda dawladda ee ugu lugta leh si iskaa ah iskugu raacaan inay kordhiyaan wakhtiga lagu xallinayo arrinta dhexdhexaadin ama hab beddel ah oo muran xallin, haddii laga helo Gobolka.
2. Ku dartaa hab-raacyada fulin waxtar leh ee go'aanka u dambeeya ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolka, haddii loo baahdo, ooy kujirto: (a) hawlo kaalmo farsamo; (b) wada xaajood; **iyo** (c) tallaabo sixis ah si loo gaadho addeecid.

Cabashada gobolka iyo dhagaysiyada xaq qofka haddii cabasho Gobol oo qoran la helo taasii sidoo kale waa maduuca dhagaysiga xaqa qofka sida hoos ku cad halka ka hoosaysa ciwaanka **Buuxinta Codsi Dhagaysiga Xaqa Qofka**, ama cabashada Gobolka waxa kujira arrimo badan oo mid ama kabadani ay kaqayb yihiin dhagaysiga noocan ah, Gobolku waa inuu dhinac iskaa dhigaa cabashada Gobolka, ama qayb kasta oo kamida cabashada Gobollka oo lagu sheegay dhagaysiga xaqa qofka ilaa dhagaysigu dhammaado. Wixii arrin kujira cabashada Gobolka oon kamid ahayn dhagaysiga xaqa qofka waa la xalliyaa iyadoo la isticmaalayo xadka wakhtiga iyo hab-raacyada sare ku cad.

Haddii arrin lagu soo qaaday cabashada Gobolka hore loogu go’aamiyey dhagaysiga xaqa qofka oo ku lug leeyihiin qaybihii uun (adiga iyo SAU), markaas dhagaysiga xaqa qofku u xanniban yahay arrinkaas waana in Wakaaladda Waxbarashada Gobolku ku wargelisaa cawdaha in go’aanku xanniban yahay.

Cabasho ku eedaynaysa SAU ama wakaaladda dawladeed oo kale inay ku hoobteen fulinta go’aanka dhagaysiga xaqa qofka waa inay xallisaa Wakaaladda Waxbarashada Gobolku.

**Buuxinta Cabasho**
**34 CFR §300.153**
Urur ama qofi wuxuu fayl garaysan karaa cabasho Gobol saxeexan oo qoran isagoo eegaya hab-raacyada sare ku cad. Cabashada Gobolka waa inay kujirta:

1. Bayaan in SAU ama wakaalad dawladeed oo kale ay jabisay shuruud Qaybta B ee IDEA ama xukumadeeda;
2. Xaqiiqooyinka bayaanka lagu saleeyey;
3. Saxeexa iyo macluumaadka lagala xidhiidho cawdaha; iyo
4. Haddii eedaymaha xadgudubku la xidhiidhan ilme gaar ah:

    a). Magaca ilmaha iyo ciwaanka meesha ilmuhu deggen yahay;
    b). Magaca dugsiga ilmuhu aado;
    c). Arrinka ilmaha ama dhalinyarta bilaa guriga ah, macluumaad lala xidhiidho oo loo heli karo ilmaha, iyo magaca dugsiga ilmuhu aado;
    d). Sharraxaad nooca dhibta ilmaha haysata, ooy kujirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibta; **iyo**
    e). Xal loo soojeediyey dhibta ilaa xadka la garanayyo loona heli karo cidda buuxinaysa cabashada xilliga cabashada la buuxinayo.

Cabashadu waa inay eedaynaysaa xadgudub dhacay wax aan sannad kabadanayn kahor taariikhda cabashada la helay sida lagu sharraxay hoosta ciwaanka **Laqabsiga Hab-raacyada Cabashada Gobolka,** *ilaa wakhti dheeri macquul yahay sababtoo ah cawduhu wuxuu codsanayaa adeegyo magdhaw ee xadgudub dhacay wax aan kabadnayn laba sano kahor taariikhda cabashada qoran ay heshay Waaxda waxbarashadu.*

Cidda buuxinaysa cabashada Gobolku waa inay isku dhaafisaa nuqul kamida cabashada SAU ama wakaalad dawladeed oo kale oo u adeegaysa ilmaha isla marka ciddu ka fayl garaysanayso cabashada Wakaaladda Waxbarashada Gobolka.

SEA, marka la eego 34 CFR 300.537, waxay go’aasan kartaa fulin Gobol ee kalfadhiga heshiiska xalka iyo heshiishka dhexdhexaadinta

**Hab-raacyada Dhagaysiga Xaqa Qofka**
***Fayl Garaynta* Codsi Dhagaysi *Xaqa Qofka***
**34 CFR §300.507**
**Guud**
Adiga ama SAU waxaad ka fayl garaysan kartaan *codsi dhagaysi* xaqa qofka wax kasta oo la xidhiidha soojeedin ama diidmo in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarasho ee ilmaha, ama siinta adeegyo *habboon ilmahaaga dhalashada ilaa 2 jirka ama* waxbarasho dawladeed habboon oo bilaash ah (FAPE) ilmahaaga *3 ilaa 20 jirka ah.*

*Codsiga dhagaysiga* xaq qofka waa inuu eedaynayaa xadgudub dhacay wax aan kabadnayn laba sano kahor intaad adiga ama SAU ogaatay ama wax ka ogayd tallaabada eedaysan taaso salka u ah *codsiga dhagaysi* xaqa qofka.

Wakhtiga sare kuma khusaysnayo haddaanad fayl garaysan *codsi dhagaysi* xaqa qofka wakhigaa gudihiisa sababtoo ah:

1. SAU ayaa been ka sheegtay inay xallisay arrimaha ku cad *codsiga dhagaysiga*; **ama**
2. SAU ayaa kaa haysatay macluumaad loo baahnaa inay kugu siiso Qaybta B ee IDEA.

**Macluumaadka waalidka loogu talogalay**

SAU waa inay kugu wargelisaa wixii sharci bilaasha ah ama qiime jaban iyo adeegyada kale ee ku tacaluqa meesha ka jira haddaad codsato macluumaadka, **ama** ama haddii SAU ay fayl garaysay *codsi dhagaysi* xaqa qofka.

***Codsiga Dhagaysiga* Xaqa Qofka**
**34 CFR §300.508**
**Guud**

Si aad u codsato dhageysi, adiga ama SAU(amaba qareenkaaga ama qareenka SAU) waa in uu dhinaca kale usoo gudbiyaa codsi dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista. Codsiga dhageysiga waa inuu ka koobnaadaa dhamaan waxyaabaha ee hoos ku xusan waana in la xifdiyaa.

Adiga ama SAU, qofkii soo gudbiyay codsiga dhageysiga waa inuu sidoo kale Hay'adda Tacliinta ee Gobolka farta kasaaraa koobi ah codsiga dhageysiga, codsi dhageysi waxaa loo tixgelin doonaa sidi in lahelay, jadwalka tooska ah oo ku dabaqma dhageysiga, marki Hay'adda tacliinta ee Gobolka ay hesho koobiga codsiga oo ay kujirto warbixinta loo baahnaa ayna heshay xaqiijin oo ah in qolada kasoo horjeeda ay sidoo kale heshay codsiga.

**Tusmada *codsiga dhagaysiga***

*Codsiga dhagaysiga* xaqa qofku waa inay kujirtaa:

1. Magaca ilmaha;
2. Ciwaanka guriga ilmuhu deggen yahay;
3. Magaca dugsiga ilmaha;
4. Hadduu ilmuhu bilaa guri yahay, macluumaadka laga xidhiidho ilmaha iyo magaca dugsiga ilmaha;
5. Sharraxaad nooca dhibta ilmaha ee la xidhiidha tallaabada la soojeediyey ama diiday, ooy kujirto xaqiiqooyin la xidhiidha dhibta; **iyo**
6. Xal la soojeediyey ee dhibta ilaa xadka la ogyahay aanad heli karto adigu ama SAU wakhtigaas.

**Ogaysiis ayaa loo baahan yahay kahor dhagaysiga *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka**

Adiga ama SAU waxa dhici karta inaydaan lahayn dhagaysiga xaqa qofka ilaa adiga ama SAU (ama qareenkaaga ama qareenka SAU), uu fayl gareeyo *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka oo ay kujirto macluumaadka sare ku qoran.

**Filaanshaha *codsiga dhagaysiga***

Si uu *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku hore ugu socda, waa in laga fikiraa kaafiyid. Codsiga dhagaysiga xaq qofka waxa loo tixgaliyaa kaafiyid (si loo buuxiyo shuruudaha tusmada sare) ilaa cidda helaysa *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku (adiga ama SAU) ay ku wargelinayso sarkaalka dhagaysiga iyo cidda kale qoraal, 15 cisho gudahood helista *codsiga dhagaysiga*, in cidda helaysaa rumaysan tahay in *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku aanu buuxin shuruucaha sare ku qoran.

Shan cisho gudahood helista ogaysiinta cidda helaysa (adiga ama SAU) waxay u tixgalisay *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka mid aan kaafi ahayn, sarkaalka dhagaysigu waa inuu go'aansadaa haddii codsiga dhagaysiga xaqa qofku uu buuxiyey shuruudaha sare ku qoran, kuguna ogaysiin doonaa adiga iyo SAU qoraal si dhakhso ah.

**Wax kabeddelka *codsiga dhagaysiga***
Adiga ama SAU waxaad ku samayn kartaan isbeddelo *codsiga dhagaysiga* haddii oo kaliya;

1. Cidda kale ku oggolaato isbeddelada qoraal lana siiyo fursad si uu ugu xalliyo *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka kulan xallineed, ee hoos ku cad; **ama**
2. Mar aan ka dambayn shan cisho kahor marka dhagaysiga xaqa qofku bilaabmay, sarkaalka dhagaysigu uu dammaanadqaado oggolaanshaha isbeddelada.

Haddii cidda cabanaysaa (adiga ama SAU) ay ku samayso isbeddelo codsiga dhagaysiga xaqa qofka, wakhtiyada kulanka xallinta (15 cisho gudahood xilliga helsta *codsiga dhagaysiga*) iyo wakhtiga xalku (30 cisho gudahood xilliga helista *codsiga*) mar kale bilaabmayo taariikhda *codsiga dhagaysiga* wax ka beddelka la fayl gareeyey.

**Wakaaladaha waxbarashada gudaha (LEA) ama u jawaabista SAU codsiga dhagaysiga xaqa qofka**
Haddii SAU aanay kuu soo dirin ogaysiis qoraal ah oo hore, sida ku cad hoosta ciwaanka **Ogaysiis Qoran oo Hore**, ee la xidhiidha waxa laga hadlayo *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofka, SAU waa inay, 10 cisho gudahood ee helista *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka, kuusoo dirtaa jawaab ay kujirto:

1. Sharraxaad sababta SAU u soojeedisay ama u diiday inay qaado tallaabada lagu soo qaaday *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka;
2. Sharraxaad ikhtiyaaro kale kaasoo Kooxda barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay (IEP) tixgalisay iyo asbaabta loo diiday fursadahaas;
3. Sharraxaad hab-raac qiimayn, diiwaangalin, ama warbixin SAU u isticmaashay salka tallaabada la soojeediyey ama la diiday; **iyo**
4. Sharraxaad arrimaha kale ee ku tacaluqa tallaabada soojeedinta iyo diidista SAU.

U bixinta macluumaadka 1-4 sare ku qoran kama horoogsanayso SAU inay si cad u tidhaa in *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofku aanu kaafi ahayn.

**Jawaabta cidda kale ka bixisay *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka**

Laga reeba sida lagu sheegay ciwaan hooskan sare, **wakaaladda waxbarashada Deegaanka (LEA) ama jawaabta SAU ee codsiga dhagaysiga xaqa qofka**, cidda helaysa *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku waa inay, 10 cisho gudahood helista codsiga, u dirta cidda kale jawaab sheegaysa arrimaha kujira *codsiga dhagaysiga xaqa qofka.*

**Foomam Nooca**
**34 CFR §300.509**
Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay soosaartaa foomam nooca si ay kaaga caawiyaan fayl garaysiga *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka iyo cabashada Gobolka. Si kastaba, Gobolkaaga ama SAU-daadu waxay kaaga baahan karaan inaad isticmaasho foomamkan. Xaqiiqdii, waad isticmaali kartaa foomkan ama foom kale oo habboon, ilaa inta ay kujirto macluumaadka looga baahan yahay buuxinta *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka ama cabashada Gobolka.

**dhexdhexaadin**
**34 CFR §300.506**
**Guud**

SAU waa inay kuu suurogalisaa dhexdhexaadin si ay kuugu oggolaato adiga iyo SAU inaad xallisaan khilaafkiina ku lugta leh wax kasta oo hoos yimaad Qaybta B ee IDEA, ooy kujiraan arrimaha soo baxay kahor fayl garaysiga *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka. Haddaba, dhexdhexaadin ayaa la heli karaa si loogu xalliyo muranka Qaybta B ee IDEA, haddaad iyo haddaanad fayl garaysan *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka si aad u codsato dhagaysi xaqa qofka sida ku cad hoosta ciwaanka fayl garaynta **Codsi Dhagaysi Xaqa Qofka.**

**Shuruudaha**

Hab-raacyadu waa inay xaqiijiyaan in hab-socodka dhexdhexaadintu:
1. Uu yahay iskaa dhinacaaga iyo dhinaca SAU;
2. Aan loo isticmaalin in lagu diido ama dib loogu dhigo xaqaaqa dhagaysi xaqa qofka, ama lagu diido wixii kale ee xuquuq ku leedahay Qaybta B ee IDEA; **iyo**
3. Uu sameeyey dhexdhexaadiye xirfadle sare leh oo caadil ah kaasoo aad ugu tabobaran farsamooyinka dhexdhexaadinta.

SAU waxa dhici karta inay soosaarto hab-raacyo siinaya waalidka iyo dugsiyada aan dooran habka dhexdhexaadinta, fursad ay kula kulmaan, goor iyo goob u fiican, cidda wax tabanaysa:
1. Kaasoo kujira heshiishka intiti kale oo muran xallin oo habboon, xarunta tabobarka iyo macluumaadka waalidka ama xarunta khayraadka waalidka bulshada ee Gobolka; **iyo**
2. Kaasoo kuu sharxi kara faa'iidooyinka kuguna dhiirin kara isticmaalka habka dhexdhexaadinta.

Gobolku waa inuu haystaa liis dad ah kuwaasoo dhexdhexaadiyaal aqoon sare leh ah oo yaqaan shuruucda iyo xukunada la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha. Wakaaladda Waxbarashada Gobolka waa inay ku xulataa dhexdhexaadiyayaalka si nasiib ah, wareeg ah, ama hab caddaalad ah oo kale.

Gobolku waa ka masuul kharashka dhexdhexaadinta, ooy kujiraan kharashka kulanka. Kulan kasta oo kamida habka dhexdhexaadinta waa in wakhti loo sameeyaa oo lagu qabtaa meel idiin fiican adiga iyo SAU.

Haddaad adiga iyo SAU ku xallisaan muranka habka dhexdhexaadinta, labadiina qayboodba waa inaad gashaan heshiin idin qabanaya kaasoo caddaynaya xalka oo:
1. Sheegaya in wada xaajoodada dhacay muddada dhexdhexaadinta oo dhami ay sii ahaan doonaan qarsoodi loona isticmaali kari doonin caddayn ahaan wixii dhagaysi xaqa qofka ah ama dacwad madani ah; **iyo**
2. La saxeexay adiga iyo wakiilka SAU eel eh awoodda uu heshiis ku gali karo.

Heshiis dhexdhexaadin qoran, oo saxeexan waxa fulin karaa maxkamada Gobol kasta oo u leh awood sharci (maxkamad awood u leh marka la eego sharciga Gobolka inay dhagaysato kiiska noocan ah) ama maxkamad degmeed Maraykanka. (*Eeg Qaybta XVI(3)(B)(9) ee sharcigan)*

Wada xaajoodka dhacay muddada habka dhexdhexaadinta waa inay noqdaan qarsoodi. Looma isticmaali karo caddayn ahaan wixii mustabalka dhaqaysiga xaqa qofka ah ama dacwad madani ah ee maxkamad kasta oo Dawladda Dhexe ama maxkamadda Gobolka ee Gobol ku helaya kaalmo Qaybta B ee IDEA

**Caddaaladda dhexdhexaadiyaha**
Dhexdhexaadiyuhu:

1. Waxa dhici karta inaanu noqon shaqaalaha Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU taasoo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmahaaga; **iyo**
2. Waa inaanu lahayn dano shakhsi ama xirfadeed taasoo kahor imanaysa hadafka dhexdhexaadiyaha.

Qof haddii kale u qalma dhexdhexaadiye shaqaale uma aha SAU ama wakaaladda Gobolka waayo waxa lacagta siiya wakaaladda ama SAU si uu ugu shaqeeyo dhexdhexaadiyenimo.

*Qareen wuxuu matali karaa qaybta maamulka dugsiga dhexdhexaadin oo kaliya marka qareen matalayo waalidka. Qareenka matalaya waalid waa inuu siiyaa maamulaha guud ee qaybta maamulka dugsiga iyo Xafiiska Xaqa Qofka ee Waaxda Waxbarashada Maine ugu yaraan 7 cisho oo ogaysiis qoran ah kahor dhexdhexaadinta inay ku matalayaan waalidka dhexdhexaadinta. Kooxuhu waxay la tashan karaan qareemadooda kahor iyo kadib dhexdhexaadinta.*

*Haddii labada qayboodba ku heshiiyaan, qaybugu waxay saxeexi karaan tanaasul ah ogaysiisa qoran oo 7 cisho oo imaanshaha qareenka waalidka ee dhexdhexaadinta ah. Nuqul ah tanaasulka saxeexan waa in la siiyaa Xafiiska Xaqa Qofka Waaxda Waxbarashada.*

*Haddii waalidku aanu dooran inuu kaqayb noqdo dhexdhexaadinta waalidka waxa kula xidhiidhi karta foomka la-taliyaha xaqa qofka Waaxda Waxbarashada kuwaasoo kala xaajoon doona waalidka faa'idooyinka dhexdhexaadinta. Haddii waalidku uu jeclaado inuu codsato dhexdhexaadin ama jeclaa macluumaad badan oo kusaabsan dhexdhexaadinta, waalidku wuxuu la xidhiidhi karaa, Xafiiska Xaqa Qofka ee Waaxda Waxbarashada Maine 624-6644.*

***Xaaladda* Meelaynta Ilmaha *Muddada Rafcaanadu Dhexda Jiraan ("qotomnaan")***
**34 CFR §300.518**
Laga reebo sida ku qoran hoos hoosta ciwaanka HAB-**RAACYADA MARKA LA ANSHAX MARINAYO CARRUURTA NAAFADA AH**, *muddada uu dhexda kujiro dhexdhexaadintu ama codsiyada baadhitaanka cabashada Gobolku, ama* marka *codsi dhagaysi* xaqa qofka ah loo diro cidda kale, iyo inta sugisa go'aanka wixii dhagaysi xaqa qofka oo caddaalad ah ama dacwad maxkamadeed, ilmahaagu waa inuu ku baaqi yahay meelayntiisa waxbarasho ee hadda ilaa adiga iyo Gobolka ama SAU aad ku heshiisaan.

Haddii *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku uu ku lug leeyahay codsiga oggolaanshaha hore ee dugsiga dawladda, ilmahaaga, adoo oggol, waa in lagu meeleeyaa barnaamijka joogtada dugsiga dawladda ilaa dhammaanshaha dacwadahan oo dhan.

Haddii *codsiga dhagaysiga* xaqa qofku ku lug leeyahay codsi adeegyada hore marka la eego Qaybta B ee IDEA ee ilme ka gudbaya ugu adeega marka la eego Qaybta C ee IDEA ilaa Qaybta B ee IDEA kaasoo aan xaqna u sii lahayn adeegyada Qaybta C waayo ilmuhu wuxuu dhaafay saddex, SAU loogama baahna inay siiyaan adeegyada Qaybta C ee ilmuhu helayey. Haddii ilmaha la ogaado inuu mutaystay marka la eego Qaybta B ee IDEA aanad oggolaatay ilmuhu inuu helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha markii u horraysay, markaa, sugista natiijada dacwadda, SAU waa inay bixisaa waxbarashadaas

gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha kuwaasoo aan muran kujirin (kuwa adiga iyo SAU isku raacsan tihiin).

**Habka Xalka**
**34 CFR §300.510**
**Kulanka xalka**
15 cisho gudahood helista ogaysiiska *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofku, iyo kahor intaanu bilaabin *dhagaysiga* xaqa qofku, SAU waa inay kuugu yeedhaa inay kula kulmaan adiga iyo xubinta ama xubnaha ay khusayso ee Kooxda barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay (IEP) kuwaasoo aqoon khaas ah u leh xaqiiqooyinka lagu aqoonsaday *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofka. Kulanku:

1. Waa inuu kujiraa wakiil SAU kasocda kaasoo leh awood go'aan qaadasho isagoo ka wakiil ah SAU; **iyo**
2. Waxa dhici karta inaanu kujirin qareen SAU ka socda ilaa uu ku weheliyo qareenkaagu.

Adiga iyo SAU waxay go'aansanayaan xubnaha ay khusayso Kooxda IEP si ay u yimaadaan kulanka.

Qasdiga kulanka adiga ayey kuu taalaa inaad ka hadasho *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka, iyo xaqiiqooyinka kuwaasoo salka u ah *codsiga dhagaysiga*, sidaas darteed SAU waxay haysataa fursadda ay ku xalliso muranka
Kulanka xalku lama huraan ma aha haddii:

1. Adiga iyo SAU aad ku heshiisaan qoraal inaad ka tanaasusheen kulanka; **ama**
2. Adiga iyo SAU aad ku heshiiseen inaad isticmaashaan habka dhexdhexaadinta, sida lagu sharxay hoosta ciwaanka **Dhexdhexaadin.**

**Wakhtiga xalka**
Haddii SAU aanay u xallin *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka si aad raali ka tahay 30 cisho gudahood helista *codsiga dhagaysiga* (muddada uu socdo habka xallintu), dhagaysiga xaqa qofku ayaa dhici kara.

Muddada 45 cisho ah ee soosaarista go'aan kama dambays ah wuxuu bilaabmaa dhammaadka 30 cisho ee wakhtiga xallinta, oo leh ka raabanayaal cayiman e isku hagaajin lagu sameeyey 30 cisho ee wakhtiga xallinta, sida hoos ku cad.

Laga reebo halka adiga iyo SAU aad ku heshiiseen inaan ka tanaasushaan habka xalka ama inaad isticmaashaan dhexdhexaadin, ku fashilankaaga inaad kaqaybqaadato kulanka xalku wuxuu dib u dhigi doonaa wakhtiga habka xalka dhagaysiga xaqa qofku ilaa aad waafaqdo inaad kaqaybqaadato kulan.

Haddii kadib samaynta dadaalo macquul ah iyo kaydinta dadaaladan, SAU awoodi mayso inay hesho kaqayb noqoshadaada kulanka xalka, SAU waxa dhici karta, in dhammaadka 30 cisho ee wakhtiga xalka, ay codsato in sarkaalka dhagaysigu diido *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofka. Kaydinta dadaalada noocan ah waa inuu kujiraa diiwaan ah isku dayada SAU ee inay qabanqaabiyaan goor iyo goob la isku waafaqsan yahay, sida:

1. Diiwaanada tilifoonada la garaacay ama la isku dayay iyo natiijada tilifoonadan oo faahfaahsan;
2. Nuqulada waraaqaha laguu soo diray iyo wixii jawaaba la helay; iyo
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka gurigaaga ama goobtaada shaqada lagu yimi iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii SAU ku fashilanto inay ku qabtaan kulanka xalka 15 cisho gudahood helista ogaysiiska *codsigaaga dhagaysiga* xaqa qofka **ama** ku fashilanto inay kaqaybqaadato

kulanka xalka, waxaad waydiisan kartaa sarkaal dhagaysi inuu amro in 45 cisho ee wakhtiga dhagaysiga xaqa qofku bilaabmo.

**Isku hagaajinta wakhtiga xalka 30 cisho ah**
Haddaad adiga iyo SAU aad ku heshiisaan qoraal inaad ka tanaasushaan kulanka xalka, dabadeed wakhtiga 45 cisho ee dhagaysiga xaqa qofku wuxuu bilaabmaya maalina xigta. Kadib bilawga dhexdhexaadinta ama kulanka xalka iyo kahor dhammaadka 30 cisho ee wakhtiga xalka, haddaad adiga iyo SAU aad ku heshiisaan qoraal in wax heshiis ahi aanu suurogal ahayn, dabadeed wakhtiga 45 cisho ee dhagaysiga xaqa qofka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

Haddii adiga iyo SAU aad ku heshiiseen habka dhexdhexaadinta, dhammaadka 30 cisho ee wakhtiga xalka, labada qayboodba waxay isku raaci karaan isagoo qoran dhexdhexaadin ilaa heshiis la gaadho. Si kastaba, haddii adiga ama SAU ka noqdo habka dhexdhexaadinta, dabadeed 45 cisho ee wakhtiga dhagaysiga xaqa qofka ayaa bilaabmaya maalinta xigta.

**Heshiis dejin oo qoraal ah**
Haddii xal muranka lagu gaadhay kulanka xalka, adiga iyo SAU waa inaad gashaan heshiis sharci ahaan idin qabanaya kaasoo ay:
1. Saxeexaan adiga iyo wakiilka SAU kaasoo awooda inuu SAU heshiis u galo; **iyo**
2. Laga fulan karo maxkamadda Gobol kasta oo leh sharci qabanaya (maxkamad Gobol taasoo awoodda inay dhagaysato kiiska noocan ah) maxkamad degmeed ee Maraykanka. (Eeg Qaybta XVI(11)(F))

**Wakhtiga dib-u-eegista heshiiska**
Haddaad adiga iyo SAU ku gasheen heshiis kulanka xalka, midkiin (adiga ama SAU) wuu burin karaa heshiiska 3 maalin shaqo gudahood ee wakhtiga aad adiga iyo SAU aad heshiiska saxeexdeen.

**Dhagaysiga *Codsiga Dhagaysiga* Xaqa Qofka**
**Dhagaysiga Xaqa Qofka oo Caddaalad ah**
**34 CFR §300.511**
**Guud**
Markasta oo *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka la fayl gareeyo, adiga iyo SAU-da ku jiray muranka waa inaad heshaan fursad dhagaysi xaqa qofka oo caddaalad ah, sida ku cad qaybaha **Codsiga Dhagaysiga Xaqa Qofka** iyo **Habka Xalka**.

**Sarkaal dhagaysi caddaali ah**
Ugu yaraan, sarkaal dhagaysi:
1. Waa inaanu noqon shaqaale ka tirsan Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU kuwaasoo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka ilmaha. Si kastaba, qofna ma aha shaqaale wakaalad si gaar ah sababtoo ah waxa lacagta siiya wakaaladda si ay ugu shaqeeyaan sarkaal dhagaysi ahaan;
2. Waa inayna lahayn dano shakhsi ama xirfadeed taaso kahor imanaysa hadafka sarkaalka dhagaysiga ee dhagaysiga;
3. Waa inuu yahay mid wax og oo fahamaya bixinaha IDEA, iyo xukumada Dawladda Dhexe iyo Gobolka ku tacaluqa IDEA, iyo tarjumaadaha sharci ee IDEA oo ay sameeyaan maxkamadaha Dawladda Dhexe ama Gobolka; **iyo**
4. Waa inuu yeeshaa aqoonta iyo awoodda si uu u fuliyo dhagaysiga, iyo inuu sameeyo oo qoro go’aamadda, waafaqsan dabbakhaadda sharci heer ah, oo habboon.

SAU kastaa waa inay haystaan liis dadkan ah kuwaaso u adeegga saraakiil dhagaysi ahaan taasoo ay kujirto bayaanka u qalmidda ee sarkaal dhagaysi oo kasta.

**Waxa lagaga hadlayo dhagaysiga xaqa qofka**
Midkiina (adiga ama SAU) codsaday dhagaysiga xaqa qofka waxa dhici karta inaan lagu soo qaadin arrimaha dhagaysiga xaqa qofka kuwaasoo aan lagu sheegin *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka, ilaa cidda kale oggolaato

**Wakhtiga codsiga dhagaysi**
Adiga ama SAU waa inaad codsataan dhagaysi caddaalad ah *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka laba sano gudahood ee taariikhda ama SAU ogaatay ama wax ka ogayd arrinka lagu sheegay *codsiga dhagaysiga.*

**Ka reebanayaasha wakhtiga**
Wakhtiga sare kuma khuseeya haddaanad fayl garaysan karayn codsiga dhagaysiga xaqa qofka sababtoo ah:
1. SAU waxay si gaar ah been uga sheegay inay xallisay dhibtii ama soosaartay in aad kusoo qaadayso codsiga dhagaysiga; **ama**
2. SAU waxay kaa haystaan macluumaad looga baahnaa inay ku siiyaan marka la eego Qaybta B ee IDEA.

**Xuquuqda Dhagaysiga**
**34 CFR §300.512**
**Guud**
Cid kasta marka la eego dhagaysiga xaqa qofka (ooy kujirto dhagaysi la xidhiidha hab-raac anshax marin) waxay xaq u leedahay inay:
1. La socdo oo la taliyo looyar iyo/ama dad leh aqoon gaar ah ama tabobarro la xidhiidha dhibaatooyinka carruurta naafada ah
2. Keenaan caddayn kuna caddeeyaa, su’aalaa, waxana looga baahan yahay keenesta marag;
3. Diidaan hordhaca wax caddayn ah dhagaysiga kaasoon loo muujin ciddaas ugu yaraan shan cisho dhagaysiga kahor;
4. Helaan diiwaanka dhagaysiga oo qoran, ama, ikhtiyaarkaaga, elektarooniya, eray calaa eray u duuban, **iyo**
5. Helaan xaqiiqooyin iyo go’aamo qoran, ama ikhtiyaarkaaga, elektarooniya.

**Shaac kaqaadidda kale ee macluumaadka**
Ugu yaraan shan cisho kahor dhagaysiga xaqa qofka, adiga iyo SAU waa inay muujiyaan midba midka kale dhammaan qiimaynaha la dhammaystiray taariikhdaas iyo talo bixinada ku salaysnaa qiimaynahaas aad adiga ama SAU aad ugu talo gasheen inaad isticmaashaan dhagaysiga.

Sarkaal dhagaysi waxa dhici karta inuu ka horyimaad ciddii ku fashilanta inay adeecdo shuruuddan ka timi soo bixista qiimayna ku tacaluqda ama talo bixinta dhagaysiga oggolaansho la’aanta cidda kale.

**Xaquuqda waalidnimo marka dhagaysiga**
Waa in lagu siiyo xaqa aad u leedahay in
1. Ilmahaaga ku keento
2. Aad ugu furayso dhagaysiga dadwaynaha; **iyo**
3. Aad haysato diiwaanka dhagaysiga, raadinta xaqiiqda iyo go’aamada lagu siiyey bilaashka.

**Go’aanka Dhagaysiga**
**34 CFR §300.513**
**Go’aanka sarkaalka dhagaysiga**
Go’aanka sarkaalka dhagaysiga ee kusaabsan haddii ilmahaaga (*dhalashada ilaa 2 jir*) helay *adeegyada habboonaa* ama (*3 ilaa 20 jir*) helay waxbarashada dawladda habboon oo bilaash ah (FAPE) waa inay ku salaysnaadaan xaqiiqooyin.

Arrimaha ku eedaynaya xadgudub hab-raaceed, sarkaal dhagaysi wuxuu ogaan karaa in ilmahaagu aan helin *adeegyadii habboonaa* ama FAPE kaliya haddii fillaansho la’aanta hab-raaceed:
1. Farogalisey xaqa ilmahaaga ee *adeegyada habboon* ama waxbarashada dawladda habboon ee bilaashka ah;
2. Si aad ah u farogalisey fursadda aad u haysatey inaad kaqayb noqoto habka go’aan qaadashada la xidhiidha siinta *adeegyada habboon* ama waxbarashada dawladda habboon ee bilaashka ah (FAPE) ilmahaaga; **ama**
3. Sababtay u diidsita faa’idada waxbarasheed.

***Ogaysiiska Go’aanka u Dambeeya***
*Go’aan kasta oo la qaatay gabagabada dacwad ku lug leh xukunkan waa inuu noqdaa qoraal kuna jiraan xaqiiqooyin ku filan si loola socodsiiyo kooxaha xubin kasta oo xiisaynaysa oo dadwaynaha ah aasaaska go’aanka.*

**Heshiiska dhismaha**
Wax kamida bixinaha sare ku cad lama tarjumi karo si looga hortago sarkaal dhagaysi amridda SAU inay adeecdo shuruudaha qaybta hab-raaca dhawrista ee xukumada Dawladda Dhexe marka la eego Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536).

**Codsi gaar ah ee dhagaysiga xaqa qofka**
Wax kamida qaybta hab-raaca dhawrista ee xukumada Dawladda Dhexe ee Qaybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536) lama tarjumi karo si lagaaga ilaaliyo fayl garaysiga *codsi dhagaysi* xaqa qofka gaar ah oo kusaabsan arrin ka duwan codsiga dhagaysiga xaqa qofka ee hore loo gareeyey.

**Xaqiiqooyin iyo go’aanada oo u taga guddida talo bixinta iyo dadwaynaha**
Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU, (mid kasta oo ka masuul ah dhagaysigaaga) kadib jarista macluumaad kasta oo qofka lagu garan karo, waa inay:
1. Siiyaan xaqiiqooyinka iyo go’aamada dhagaysiga xaqa qofka ama codsiga guddida talo bixinta waxbarashada Gobolka ee gaarka ah; **iyo**
2. Uga dhigaan xaqiiqooyinkan iyo go’aamadan inay helaan dadwaynuhu.

**Rafcaanada**
**Gabagabada Go’aanka; Rafcaan**
**34 CFR §300.514**
**Gabagabada go’aanka dhagaysiga**
Go’aan lagu qaatay dhagaysiga xaqa qofka (ooy kujiraan dhagaysi la xidhiidha hab-raaca anshaxa) *waa inuu noqdaa* qoraal iyo gabagabo, laga reebo in cid kasta oo ku lug lahayd dhagaysigu (adiga ama SAU) ay rafcaan ka qaadan karto go’aanka iyadoo soo oogaysa tallaabo rayid, sida hoos ku cad.

**Wakhtiyada iyo Habboonaanshaha Dhagaysiga iyo Dib-u-eegista**
**34 CFR §300.515**

Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay hubisaa in wakhti aan ka dambayn 45 cisho kadib dhammaanshaha 30 cisho ee wakhtiga kulanka xalka **ama**, sida ku cad hoosta ciwaanka **Isku hagaajinta 30 cisho oo wakhtiga xalkaah**, xilli aan ka dambayn 45 cisho kadib dhammaanshaha wakhtigii la isku hagaajiyey:

1. Go’aan kama dambays ah lagu gaadho dhagaysiga; **iyo**
2. Nuqul go’aanka ah loo diro koox kasta.

Sarkaalka dhagaysigu wuxuu dammaanadqaadi karaa kordhin cayiman ee wakhti ka baxsan wakhtiga 45 cisho ee sare ku cad codsiga labada qaybood midkood dartii.

Dhagaysi kasta waa in lagu qabtaa goor iyo goob idiin fiican adiga iyo ilmahaaga.

**Tallaabooyinka Rayidka, Ooy Kujirto Wakhtiga la Fayl Garaynayo Tallaabooyinkaas**
**34 CFR §300.516**
**Guud**

cid kasta (Adiga ama SAU) oon ku qancin xaqiiqooyinka iyo go’aamada dhagaysiga xaqa qofka (ooy kujirto dhagaysi la xidhiidha hab-raacyada anshax marinta) waxay xaq u leedahay inay ku soo oogto dacwad rayid marka la eego wixii ahaa mawduuca dhagaysiga xaqa qofka. Dacwadda waxa la keeni karaa maxkamad Gobol oo awood sharci u ah (maxkamad Gobol taasoo leh awoodda dhagaysiga kiiska noocan ah) ama maxkamad degmo ee Maraykanka iyadoon la eegin waxa lagu muransan yahay.

*Haddii waalidku hayo wax su’aal ah oo la xidhiidha shuruuddan, waa in loo soo tilmaamaa Xafiiska Xaqa Qofka ee Waaxda Waxbarashada Maine 624-6644.*

**Xadka wakhtiga**

Cidda (adiga ama SAU) soo oogaya dacwaddu waxay haysataa *90 cisho laga bilaabo helista* go’aanka sarkaalka dhagaysiga si uu u fayl garaysto dacwad rayid.

**Hab-raacyo dheeraad ah**

Dacwad kasta oo madani ah, maxkamaddu:

A. Heshaa diiwaanada dacwadaha maamulka
B. Dhagaysataa caddaymo dheeraad ah codsigaaga ama codsiga SAU; **iyo**
C. Waxay ku salaysaa go’aankeeda tirada iyo tayada caddaynta waxayna dammaanqaadaa xalka maxkamaddu go’aansato inuu habboon yahay.

**Awoodda sharci ee maxkamadaha degmada**

Maxkamadaha degmada ee Maraykanku waxay awood u leeyihiin inay xukumaan dacwadha hoos yimaada Qaybta B ee IDEA iyadoonay tixgalin inta uu leeg yahay waxa lagu muransan yahay.

**Xukunka dhismaha**

Wax kuma jir Qaybta B ee IDEA xanibaya ama xaddidaya xaquuqda, hab-raacyada, iyo xalalka laga heli karo Dastuurka Maraykanka, Xeerka Dadka Maraykanka Naafada ah ee 1990, Xeerka Dhaqan-celinta Mansabka V ee 1973 (Qaybta 504), ama shuruuc Dawladda Dhexe oo kale ayaa ilaalinaya xuquuqda carruurta naafada ah, laga reebo in kahor fayl garaynta dacwad madani ah shuruucdan hoostooda adoo raadinaya xal kaasoo sidoo kale laga heli karo Qaybta B ee IDEA, hab-raacyada xaqa qofka ku cad sare waa inuu joogsadaa ilaa xad la mida sidii loogu baahan lahaa haddii ciddu ay ku fayl garaysatay dacwadda Qaybta B ee IDEA. Tani waxay ka dhigan tahay inaad heli karto xalal ka jira shuruucda kale

kuwaasoo ku laba jeer qoran kuwaas ka jira IDEA, laakiin si guud, si aad uga hesho xal shuruucdan, waa inaad marka hore isticmaashaa xalalka maamul ee ka jira IDEA (sida *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka, kulka xalka, iyo hab-raacyada dhagaysiga xaqa qofka ee caddaaladda ah) intaanad toos u tagin maxkamad

**Khidmadda Qareenka**
**34 CFR §300.517**
**Guud**
Dacwad kasta oo hoos timaad Qaybta B ee IDEA, haddaad joogtayso, maxkamadu, go'aankeda, waxay kugu abaalmarin kartaa khidmad qareen macquul ah oo kharash kugu ahaa adiga.

Dacwad kasta oo hoos timaad Qaybta B ee IDEA, haddaad joogtayso, maxkamadu, go'aankeda, waxay kugu abaalmarin kartaa khidmad qareen macquul ah oo kharash ku ahaa Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU ee jirta, si lacagta uu u siiyo qareenkaagu, haddii qareenku: (a) uu fayl gareeyey codsi dhagaysi xaqa qofka ama kiis maxkamadeed oo maxkamadu ogaatay inuu yahay bilaa qiime, macquul ahayn, ama bilaa aasaas ah; **ama** (b) sii wado inuu dacweeyo kadib markii dacwadu caddaatay inayna macno lahayn, macquul ahayn, ama aanay sal lahayn; **ama**

Dacwad kasta oo hoos timaad Qaybta B ee IDEA, maxkamadu, go'aankeeda, waxay abaalmarin u bixin kartaa khidmadda qareenka macquul ah iyadoo kaqayb ah kharashaadka Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU ee jirta, si ay lacag u bixiyaan adiga ama qareenkaagu, haddii codsigaaga dhagaysiga xaqa qofka ama kiis maxkamadeed oo dambe loo keenay ujeedo aan sax ahayn, sida in loo hanjabo, loo sababo dib dhacyo aan lama huraan ahayn, si aan lama huraan ahayn loo kordhiyo kharashka dacwadda.

**Abaalmarinta khidmadda**
Maxkamadi waxay abaalgud u bixisaa khidmadda qareen macquul ah sidan:
1. Khidmaddu waa inay salka ku haysaa sicir ka jira bulshada taasoo dacwaddu ama dhagaysigu ka jirto ee nooca iyo tayada adeegga la qabtay. Wax dheeraad ama korodh ah lama isticmaali karo xisaabinta abaalmarinta.
2. Khidmado waxa dhici karta inaan la abaalmarin oo kharashka la xidhiidhana waxa dhici karta inaan la magdhabin dacwad kasta oo hoos timaad Qaybta B ee IDEA ee adeegyada la gutay kadib marka lagu siiyo dooransiin qoraal ah oo xaleed haddii:
   a. Dooransiinta lagu sameeyey gudaha wakhtigii la qoray Xukun 68 ee Xukunada Dawladda Dhexe ee Hab-raacyada Madaniga ama, kiiska dhagaysi xaqa qofka ama dib-u-eegista heer Gobol, xilli kasta in kabadan 10 cisho kahor intay dacwaddu bilaabantay;
   b. Dooransiinta aan lagu aqbalin 10 cisho gudahood; **iyo**
   c. Maxkamada ama sarkaalka maamulka dhagaysigu uu ogaado in xalka aad ugu dambayntii heshay aanu kaaga fiicnayn dooransiinta xalka. Inkasta ooy jiraan xannibaadahani, haddana abaalmarin khidmadda qareenka ah iyo kharashaadka la xidhiidha ayaa laguu samayn karaa haddaad joogtayso oo si cadna laguugu caddaalad falay diidista dooransiinta xalka.
3. Khidmadda waxa dhici karta inaan la bixin la xidhiidha kulanka kasta ee Kooxda barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay (IEP) ilaa kulanka loo qabto dacwadda maamulka ama dacwadda maxkamada dartood.

Kulan xaleed, sida ku cad hoosta ciwaanka **Kulanka xalka**, looma tixgalinayo kulan loo qabtay dhagaysi maamuleed ama dacwad maxkamadeed dartood, sidoo kalena loo tixgalin dhagaysi maamuleed ama dacwad maxkamadeed siinaha khidmadda qareenka dartii.

Maxkamadu waa dhintaa, sida habboon, xaddiga khidmadda qareenka abaalgudka loogu bixiyey Qaybta B ee IDEA, haddii maxkamadu ay ogaato in:

1. Adiga, ama qareenkaagu, xilligii dacwadda, bilaa sabab ayaad dib ugu dhigteen xalkii u dambeeyey ee muranka;
2. Xaddiga khidmadda qareenka loo ansixiyey in lagugu abaalmariyo ay bilaa sabab uga badato sicirka saacaddii ee bulshada dhexdeed ee adeegyada la midka ah ee qareenada la xirfadda, sumcadda, iyo khibradda ah;
3. Wakhtiga lagu qaatay iyo adeegyada sharci ee la qabtau ay xaddhaaf ahaayeen marka la eego nooca dacwadda; **ama**
4. Qareenka ku matalayaa aanu siinin SAU macluumaad habboon ogayiiska codsiga xaqa qofka sida ku cad hoosta ciwaanka **Codsiga Dhagaysiga Xaqa Qofka**.

Si kastaba, maxkamadu waxa dhici karta inayna dhimin khidmadd haddii maxkamadu ogaato in Gobolku ama SAU bilaa sabab dib ugu rideen xalka ugu dambeeya dacwadda ama uu jiray xadgudub marka la eego siinta hab-raaca dhawrista ee Qayba B ee IDEA.

**Hab-raacyada Marka la Edbinayo Carruurta Naafada ah**
**Maamulka Shaqaalaha Dugsiga**
**34 CFR §300.530**
**Go'aaminta kiis calaa kiis**
Shaqaalaha dugsi waxay u tixgalin karaan duruufaha gaarka ah nidaam ku salaysan kiis calaa kiis, marka la go'aaminayo haddii beddel meelayn, la sameeyey iyadoo la eegayo shuruudahan soo socda ee la xidhiidha anshaxa, ay ku habboon yihiin ilme naafo ah kaasoo jabiya xeerka dugsiga ee dhaqanka ardayga.

**Guud**
Ilaa xadka ah inay sidoo kale ka qaadaan tallaabadan carruurta aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsig waxa dhici karta, inaan ka badnayn **10 maalin dugsi** oo isku xiga, ay ka saaraan ilme naafo ah oo jabiyey xeerka dhaqanka ardayga meelayntiisa hadda geeyaana bey'ad waxbarasho beddel ah oo kumeelgaadha (kaasoo ay tahay inay go'aansadaan Kooxda barnaamijka la khaasyeelay (IEP), bey'ad kale, ka joojin. Shaqaalaha dugsigu waxa sidoo kale dhici karta inay ku soo rogaan kasaarisyo dheeraad ah ilmaha oon kabadnayn **10 maalin dugsi** oo isku xiga isla sannad dugsiyeedkaas ee dhacdooyin kala gaar gaar ah oo dhaqan xumo, ilaa inta kasaarisahani aanay keenayn beddel meelayn (ka eeg **Isbeddelka Meelayneed oo ay ugu Wacan tahay Kasaarisyo Anshaxmarin qeexdin,** hoose).

Marka ilme naafo ah laga saaray meelayntiisa hadda muddo ah **10 maalin dugsi** isla sannad dugsiyeed, SAU waa inay, muddada wixii maalmo soo raaca ee saarista sannad dugsiyeedkaas, siisaa adeegyo ilaa xadka looga baahan yahay hoos ee ka hooseeya ciwaan hoosaadka **Adeegyo**.

**Awood dheeraad ah**
Haddii habdhaqanka jabiyey xeerka dhaqanka ardayga aanay ahayn mid caddaynaya naafanimada ilmaha (eeg **go'aansiga Waadixinta**, hoos) isbeddelka edebeed ee meelayntuna ay ka badato **10 maalin** dugsi oo xidhiidh ah, shaqaalaha dugsigu waxay ku isticmaali karaan hab-raacyada edebeed ee ilmahaas leh naafada ah si la mida iyo muddo la mida sida carruurta aan naafada ahay, laga reebo in ay tahay in dugsigu siiyo adeegyada ilmahaas sida ku cad hoos ee ka hoosaysa **Adeegyada**. Kooxda IEP-da ilmuhu waxay go'aamiyaan bey'adda waxbarasheed ee kumeelgaadhka ah ee adeegyada noocan ah.

**adeegyada**
adeegyada ay tahay in la siiyo ilme naafo ah kaasoo laga saaray meelaynta ilmaha ee hadda waxa lagu siin karaa bey'ad waxbarasheed beddel ah oo kumeelgaadh ah.
SAU waxa kaliya ee laga rabaa inay siiso adeegyo ilme naafo ah kaasoo laga saaray meelayntiisa hadda **10 meelin dugsiyeed ama kayar** sannad dugsiyeedkaas, haddii ay siiso adeegyo ilme aan naafo ahayn kaasoo si lamid ah looga saaray.

Ilme naafo ah kaasoo laga saaray meelaynta hadda ilmaha in kabadan **10 maalin dugsiyeed** waa inuu:

1. sii wadaa helista adeegyada waxbarasho, si uu u awoodo ilmuhu inuu sii wato inuu kaqaybqaato manhajka guud ee waxbarashada, inkastoo ay tahay bey'ad kale, iyo inuu hore ugu socda xagga gaadhista ahdaafta la dhigay IEP-ga Ilmaha; **iyo**
2. Helaa, sida habboon, qiimayn habdhaqan shaqeed, iyo adeegyada iyo qaab geddiga daryeelidda habdhaqanka, kuwaasoo loogu talogalay inay sheegaan xadgudubka xadgudubka habdhaqanka sidaa darteed ma kale dhici mayso.

Kadib markii ilme naafo ah laga saaray meelayntiisii hadda ee **10 maalin dugsi** isla sannad, dugsiyeedkaas, **haddii** saarista **hadduna ay** tahay **10 maalin dugsi** isku xiga ama kayar haddii ka saaristuna ayna ahayn beddel meelayneed (ka eeg qeexista hoos), dabadeed shaqaalaha dugsigu, iyagoo la-tashanaya ugu yaraan mid kamida macalimiinta ilmaha, go'aansani ilaa xadka kaasoo adeegyada looga baahan yahay inay awood u siiyaan ilmaha inuu sii wato inuu kaqaybqaato manhajka waxbarashada guud, inkastuu bey'ad kale ku sugan yahay, iyo inuu hore ugu socda gaadhista ahdaafta loo dhigay IEP-ga ilmaha.

Haddii kasaaristu tahay beddel meelayneed (ka eeg qeexdinta hoose), Kooxda IEP-ga ilmuhu waxay go'aansani adeegyada habboon si awood loogu siiyo ilmuhu inuu sii wato kaqaybqaadashada manhajka waxbarashada guud, inkastuu ku sugan yahay xarun kale, iyo inuu hore ugu socdo gaadhista ahdaafta loo dhigay IEP-ga ilmaha.

**Go'aansiga calaamadda**
**10 maalin dugsi** gudahood ee go'aan kasta si loo beddelo meelaynta ilme naafo ah sababtoo ah xadgudub xeerka habdhaqanka ardayga (laga reebo kasaarista **10 maalin dugsi** oo isku xiga ama kayar ahayna beddel meelayneed), SAU, waalidku, iyo xubnaha ku tacaluqa ee Kooxda IEP (sida ay go'aamiyeen waalidka iyo SAU) waa inay dib-u-eegaan wixii macluumaad ku tacaluqa ee kujira faylka ardayga, ooy kujiraan IEP-ga ilmuhu, wixii dul ka eegis macalin ah, iyo wixii macluumaad ku tacaluqa ee uu bixiyey waalidka si ay u go'aamiyaan:

1. Haddii dhaqanka la sheegayaa ay sababtay, ama la lahaa xidhiidh toos ah oo cad, naafanimada ilmaha; **ama**
2. Haddii dhaqanka la sheegyaa uu ahaa natiijada tooska ah ee fashilka SAU inay fuliso IEP-ga ilmaha.

Haddii SAU, waalidka, iyo xubnaha ku tacaluqa ee Kooxda IEP-ga ilmuhu go'aamiyaan in xaaladahaas midkood la buuxiyey, dhaqanku waa in la go'aamiyey si uu u noqdo caddayn naafanimada ilmaha.

Haddii SAU, waalidka, iyo xubnaha ku tacaluqa ee Kooxda IEP-ga ilmuhu in dhaqanka la sheegayo uu ahaan natiijada tooska ah ee fashilanka SAU inay fuliso IEP, SAU waa inay qaadaa tallaabo degdeg ah si ay u xalliso nusqaamahaas.

**Go’aaminta in habdhaqan uu u ahaa calaamad naafanimada ilmaha**
Haddii SAU, waalidku, iyo xubnaha ku tacaluqa ee Kooxda IEP go’aamiyaan in dhaqanku ahaa calaamad muujinaysa naafonimada ilmaha, Kooxda IEP-gu waa inay mid ahaan:

1. Fuliyaan qiimaynta habdhaqan shaqo, ilaa SAU ay fulisay qiimayn habdhaqan shaqo kahor habdhaqanka keenay inuu dhaco beddel meelayn, ooy fulisayna qorshe daryeel habdhaqan ee ilmaha; **ama**
2. Haddii qorshaha daryeelka habdhaqan hore loo soo saaray, uu dib-u-eegyo qorshaha daryeelka habdhaqanka, waxna uga beddelayo, sida looga maarmi waayo, si loo sheego habdhaqanka.

Laga reebo sida ku cad hoos halka ka hoosaysa ciwaan hoosaadka **Duruufo gaar ah**, SAU waa inay kusoo celisaa ilmaha meelayntii laga saaray, ilaa waalidka ama degmadu isku raacaan inay beddelaan meelaynta kaqayb ahaan qaab gaddiga qorshaha daryeelka habdhaqanka.

**Duruufaha gaarka ah**
Haddii uu ahaa ama aanu ahayn habdhaqanku calaamaddu muujinaysa naafanimada ilmaha, shaqaalaha dugsigu waxa dhici karta inay u raraan arday bey’ad waxbarasho beddel kumeelgaadh ah (waxa go’aamiyey Kooxda IEP-ga ilmaha) ilaa 45 maalin dugsi, haddii ilmuhu:

1. Hub usoo qaato (hoos ka eeg qeexdinta) dugsiga ama hub ku sito dugsiga, dhulka dugsiga, ama shaqada dugsiga marka la eego awooda sharci ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU;
2. Si u kas haysto ama isticmaalo daroogo sharci darro ah (hoos ka eeg qeexdinta), ama iibiyo ama raadsado iibinta daroogada, (hoos ka eeg qeexdinta), marka dugsiga uu joogo, xayn daabka dugsiga joogo, shaqada dugsiga joogo marka la eego awoodda sharci ee Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU; **ama**
3. Uu gaadhsiiyey dhaawac jidheed oo halis ah (hoos ka eeg qeexdinta) qofka kale intuu joogay, dugsiga, xayndaabka dugsiga, ama shaqada dugsiga marka la eego awoodda sharci e Wakaaladda Waxbarashada Gobolka ama SAU.

**Qeexdimo**
**Walax sharci darro ah** waxay ka dhigan tahay daroogo ama walax kale lagu caddeeyey jadwalada I, II, III, IV, am V ee qaybta 202(c) ee Xeerka Walaxda Sharci Darrada ah (21 U.S.C. 812(c)).

**Daroogada sharci darrada ah** waxay ka dhigan tahay walax sharci darro ah; laakiin aan kujirin walaxda sharci darrada ah taasoo si sharci ah loo leeyahay ama lagu isticmaalo kormeerista xirfadle daryeel caafimaad oo sharciyeysan ama kaasoo si sharci ah u leh ama ugu isticmaala marka la eego awooda kale oo hoos yimaada Xeerkaas ama siino kale oo kasta ee sharciga Dawladda Dhexe.

**Dhaawac jidheed oo halisa** wuxuu leeyahay macnaha lagu siiyey tibaaxda “dhaawac jidh ahaan halisa” halka ka hoosaysa baaragaraafka (3) ee qayb hoosaadka (h) ee qaybta 1365 ee ciwaanka 18, Qaybnuunka Maraykanka: *Dhaawac jidheed kaasoo ku lug leh halis badan oo dhimasho; xanuun jidheed oo farabadan; qaab xumayn raagta oo cad; waayid raac ama liidid shaqada xubin jidheed, awoodda xubin ama maskaxeed.*

**Hub** wuxuu leeyahay macnaha la siiyey tibaaxda “hub khatar ah” halka ka hoosaysa baaragaraafka (2) ee qayb hoosaadda hore (g) ee qaybta 930 ee ciwaanka 18, Qaynuunka

Maraykanka: *Hub, aalad, qalab, shay, ama walax, ha shaqaynayso ama yeyna shaqaynin, taasoo loo isticmaalo, ama isla markaasba awood u leh, sababidda geeri ama dhaawac jidheed oo hlis ah, laga reebo tibaaxda noocan ah aanay kujirn mindida jeebka oo leh af dhererkiisku kayar yahay 2 ½ inj*.

**Wargelin**
Taariikhda ay samaysay go'aanka rarista taasoo ah beddel meelaynta ilmaha sababtoo ah wuxuu jabiyey qaynuunka dhaqanka ardayga, SAU waa inay ogaysiisaa waalidka go'aankaa, oo siisaa waalidka ogaysiiska hab-raaca dhawrista.

**Beddelka Meelaynta Sababtoo ah Rarista Anshaxmarint Darteed**
**34 CFR §300.536**
Ka rarista ilme naafo ah meelaynta waxbarashada hadda waa **beddel meelayn** haddii:

1. Raristu ay kabadato 10 cisho oo isku xiga; **ama**
2. Ilmuhu uu la kulmay rarisyo xidhiidha kuwaasoo kenay nidaam sababtoo ah:
   a. Rarisaha xidhiidhka ah ayaa kabatay 10 maalin dugsi sannad dugsiyeed:
   b. Habdhaqanka ardaygu wuxuu aad ula mid yahay habdhaqanka ilmaha ee dhacdooyinkii hore kuwaasoo keenay rarisaha xidhiidhka ah;
   c. Arrimahan dheeraadka ah sida dhererka raris kasta, wadarta wakhtiga ilmaha la raray, iyo isku dhawaanshaha rarisaha ee midba midka kale; **iyo**

Haddii nidaam rarisyo ah ay keeento beddel meelayneed waxa u go'aansada kiis calaa kiis SAU, haddii loolan la galiyana, waxay la kulmi doonaan dib-u-eegis ilaa xaqa qofka iyo dacwadaha sharciyeed.

**Go'aaminta Bey'adda**
**34 CFR §300.531**
Kooxda barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay (IEP) waa inay go'aansadaan bey'adda waxbarasheed ee beddelka ee kumeelgaadhka ah ee rarisyada kuwaasoo ah **beddelka meelaynta**, iyo rarisaha ka hooseeya ciwaannada **Awood dheeraad ah** iyo **Duruufo gaar ah**, ee sare.

**Rafcaan**
**34 CFR §300.532**
**Guud**
Waalidka ilme naafo ahi wuxuu fayl garaysan karaa *codsi dhagaysi* xaqa qofka (hoos ka eeg) si uu u codsado dhagaysi xaqa qofka hadduu ku khilaafo:

1. Go'aan kasta oo la xidhiidha meelayn lagu sameeyey ballan-qaadyadan anshaxmarineed; **ama**
2. Calaamadda go'aaminta sare ku cad.

SAU waxay fayl garaysan karaan codsi dhagaysi xaqa qofka (sare ka eeg) si ay u codsadaan dhagaysi xaqa qofka ah hadday rumaysan tahay in joogtaynta meelaynta hadda ee ilmuhu ay aad ugu dhawdahay inay ku keento dhaawac ilmaha ama dadka kale.

**Awoodda sarkaalka dhagaysiga**
Sarkaalka dhagaysiga kaasoo daboolaya shuruudaha lagu tilmaamay hoota ciwaan hoosaadka **Sarkaalka Dhagaysi oo Caadil ah** waa inuu fuliyaa habka dhagaysiga xaqa qofka go'aanna gaadhaa. Sarkaalka dhagaysigu waxa dhici karta:

1. Inuu ku soo celiyo ilmaha naafada ah meelayntii taasoo ilmaha laga soo saaray haddii sarkaalka dhagaysigu uu go'aansado in ka saaristu ay ahayd xadgudub shuruudaha lagu

tilmaamay hoosta ciwaanka **Awoodda shaqaalaha dugsiga**, ama in dabeecadaha ilmuhu ay ahaayeen ifafaalo muujinaya naafonimada ilmaha; **ama**

2. Inuu amro u beddel meelaynta ilmaha naafada ah meel waxbarasho beddel ah oo kumeelgaadh ah oo habboon in aan ka badnayn 45 ah maalin dugsi haddi sarkaalka dhagaysigu uu go'aansado in ku sii haynta meelaynta hadda ee ilmuhu sida badan ay keento suurtogalnimada dhaawac ilmaha ama kuwa kale.

Hab-raacyadan dhagaysiga waa lasoo celin karaa, hadii SAU ay rumaysan tahay in kusoo celinta ilmaha meelayntiisii caadiga ahayd in sida badan ay keento suurtogalnimada dhaawaca ilmaha ama kuwa kale.

Markasta oo waalid ama SAU ay fayl gareeyaan *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka si ay u codsadaan dhagaysigan oo kale, dhagaysi waa in la qabtaa taasoo daboolaya shuruudaha lagu caddeeyey hoosta qaybaha hoose **codsiyada dhagaysiga xaqa qofka** marka laga reebo sidan soo socota:

1. Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay qabanqaabisaa dhagaysiga xaqa qofka oo dhakhso ah, kaasoo dhacaya **20** maalin dugsi gudahood ee taariikhda dhagaysiga la codsaday waana inay kasoo baxdaa go'aan **10** maalin dugsi gudahood dhagaysiga kadib.
2. Ilamaa waalidiinta iyo SAU ay isku raacaan qoraal ay iskaga daynayaan kulanka, ama ay isku raacaan dhexdhexaadin, kulan xallin waa inuu dhacaa **todobo** cisho gudahood ee helida ogaysiiska *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka. Dhagaysigu wuu sii socon karaa ilaa arrinka lagu xaliyo qancitaanka labada dhinac **15** cisho gudahood ee helida *codsiga dhagaysiga* xaqa qofka
3. Gobol wuxuu u hirgalin karaa xukuno hab-raaceed oo kaladuwan ee dhegaysiyada xaqa qofka dhakhso ah intii loo hirgalin lahaa dhagaysiyada xaqa qofka oo kale, laakiin marka laga reebo wakhtiga, xukunadaasi waa inay ogolaan karaan xukunada dokumentigan ku yaal ee la xidhiidha dhagaysiga xaqa qofka.

Qaybi waxay racfaan ka qaadan karaan go'aanka dhagaysiga xaqa qofka dhakhsaha ah si lamid ah sida laga yaabo inu sameeyo go'aanada kale habka dhagaysiga xaqa qofka (ka eeg **Racfaanada,** sare).

**Meelaynta Xiliga Racfaanka**
**34 CFR §300.533**

Marka, sida aynu ku sharraxnay sare, waalidka ama SAU ay fayl gareeyaan *dhagaysiga codsiga* xaqa qofka la xidhiidhay arrimo anshaxmarin, ilamuhu waa inuu (ilamaa waalidka iyo Wakaalada Gaxbarashada Gobolku ama SAU ay isku raacaan hadii kale) sii joogaa meel waxbarasho kumeelgaadh beddel ah iyadoo la sugayo go'aanka sarkaalka dhagaysiga, ama ilamaa dhammaadka wakhtiga ka saarista sida lagu bixiyay laguna sharraxay hoosta mawduuca **Awoodda shaqaalaha dugsiga** tii doontaa ha soo horraysee.

**Ilaalinta Caruurta Aan Wali Xaq u Helin Waxbarashada Gaar ka ah iyoA la Xidhiidha**
**34 CFR §300.534**
**Guud**

Haddii ilmaha aan la go'aansan inuu xaq u leeyahay waxbarashada gaar ka ah iyo adeegyada la xidhiidha uuna ku xadgudbo xeerka dhaqanka ardayga, laakiin SAU way ogayd (sida aynu ku cadynay hoos) kahor habdhaqanka kaasoo keenay tallaabada anshaxmarinta ee dhacday, in ilmuhu uu ahaa naafo, dabadeed ilmuhu wuxuu gali karaa wax ka mid ah ilaalinaha lagu sharraxay ogaysiiskan.

Aasaaska aqoonta ee arrimaha anshaxmarinta
SAU waa in laga soo qaadaa inay ogtahay in lmuhu uu yahay ilme naafo ah haddii, kahor habdhaqanka keenay tallaabada anshaxmarintu dhacday:

1. Waalidka ilmuhu ugu muujiyo qoraal ahaan in ilmuhu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha shaqaalaha kormeerista ama maamulka ee wakaalada waxbashada habboon, ama macalinka ilmaha.
2. Waalidku codsaday qiimayn la xidhiidha xaq u lahaashaha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha marka la eego Qaybta B ee IDEA; **ama**
3. Macalinka ilmuhu, ama shaqaalaha kale ee SAU ay walaac ka muujiyeen nidaamka habdhaqan ee uu ilmuhu si toos ah ugu muujiyay agaasimaha SAU ee waxbarashada gaarka ah ama shaqaalaha kale ee kormeeriseed ee SAU.

**Ka-reebanaan**
A SAU laga soo qaadi may inay aqoontan leedahay haddii:

1. Ilmaha waalidkiisa aanu oggolaan qiimayn ilmaha ama diiday adeegyada waxbarashada gaarka ah; **ama**
2. Ilmaha la qiimeeyay lana cadeeyay inaanu ahayn ilme naafo marka la eego Qaybta B ee IDEA.

Xaaladaha khuseeya haddii ayna jirin wax aqoon lagu saleeyo Hadii kahor ka qaadista tallaabo anshaxmarin ilmaha, SAU aanay aqoon u lahayn in ilmuhu uu yahay ilme naafo ah, sida aynu kusoo sheegnay xaga sare hoosta ciwaan hoosaadka **Tiirarka aqoonta arimaha anshaxmarinta** iyo **waxa Reeban**, ilmuhu uu la kulmi karo tallaabooyin anshaxmarin kaasoo lagu isticmaalo caruurta aan naafada ahayn kuwaasoo ku hawlan habdhaqano la mida.

Si kastaba, hadii la sameeyay codsi ah qiimayn ilme muddadii ilmuhu la kulmayey tallaabooyinka edbinta, qiimaynta waa in loo fuliyaa qaab dhakhso ah.

Ilamaa la dhamays tiro qiimaynta, ilmuhu waxa uu sii joogayaa meelayntii waxbarashada ee ay go'aamiyeen maamulada dugsigu, waxa ku jira kara ka joojinta ama ka eryidda bilaa adeegyada waxbarasheed.

Hadii ilmaha la go'aansaday inuu yahay ilmo naafo ah, iyadoo tixgalinta la siinayo macluumaad laga helay qiimayntii ay fuliyeen SAU, iyo macluumaadkii ay bixiyeen waalidku, SAU waa inay bixisaa wabarasho gaar ah iyo adeegyada la xidhiidha iyadoo la raacayo Qaybta B ee IDEA, ooy ku jirto shuruudaha edbinta ee ku cad xaga sare.

**U gudbinta iyo Tallaabada Hirgalinta Sharciga iyo Maamulka Cadaalada**
**34 CFR §300.535**
Qaybta B ee IDEA kama:

1. Mabnuucdo wakaalad tabinta maamulka ku habboon dambi uu sameeyey ilme naafo ahi; **ama**
2. Hortagto meel marinta sharciga Gobolka iyo maamulalada garsoorka ku isticmaalka mas'uuliyaddooda la xidhiidha codsiga sharciga Dawladda Dhexe iyo Gobolka dambiyada uu galo ilmo naafo ahi.

**Baahinta diiwaanada**
Haddii SAU ay tabiso danbi uu sameeyay ilmo naafo ahi, SAU:
1. Waa inay hubisaa in nuqulo waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshaxmarinta la gudbiyo iyadoo la tixgalinayo maamulayaasha wakaaladdu u tabiso dambiga; **iyo**
2. Waxay u gudbin kartaa nuqulo waxbarashada gaarka ah ee ilmaha iyo diiwaanada anshaxmarinta kaliya inta uu ka oggol yahay Xuquuqaha Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Gaaryeelidda (FERPA).

**Shuruudaha Meelaynta Dhinaca Kaliya ah ee Waalidka Carruurta ee Dugsiyada Gaarka Kharashka Dawladda**
**Guud**
**34 CFR §300.148**
Qaybta B ee IDEA uma baahna SAU inay bixiso kharashka waxbarashada, ay kujiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha, ee ilmaahaaga naafada ah ee dugsi gaar ah ama xarun haddii SAU ay u diyaarisay waxbarasho dawladeed habboon oo bilaasha ah (FAPE) ilmahaaga waxaanad u doori inaad gayso ilmaha dugsi ama xarun gaar loo leeyahay. Si kastaba, SAU halkaas oo uu ku yaalo dugsiga gaarka ahi waa inay ku daraan ilmahaaga dadka kuwasoo baahiyagooga lagu sheegay ballan-qaadyada Qaybta B la ee xidhiidha caruurta ay waalidkood ugu meeleeyeen dugsi gaar 34 CFR §§300.131 ilaa 300.144.

**Magdhawga meelaynta dugsiyada gaarka ah**
Haddii ilmahaagu mar hore ku helay waxbarashada gaar ka ah iyo adeegyada la xidhiidha maamulka SAU, ood dooratay inaad qorto ilmahaaga dugsi horraad, dugsi hoosaad, ama dugsi sare oo gaar ah iyagoonay ogolaan ama gudbin SAU, maxkamada ama sarkaalka dhagaysigu waxa uu uga baahan karaa wakaaladda inay kuu magdhawdo kharashka isqoristaa haddii maxkamada ama sarkaalka dhagaysigu ay ogaadaan in wakaaladdu aanay u diyaarin waxbarasho dawladeed habboon oo bilaasha (FAPE) ilmahagaaga si wakhtiyeysan kahor in isqoristaas iyo in meelayntaas gaarka ahi ay habboon tahay. Sarkaalka dhagaysiga ama maxkamadu waxay ogaan karaan in meelayntaadu ay habboon tahay, xiitaa hadii meelayntu aanay lahayn qiyaasihii Gobolka kuwaas qabta waxbarashada ay bixiyaan Wakaalada Waxbarashada Gobolka iyo SAU.

**Xaddidaadaha magdhowga**
Qiimaha magdhowga ee lagu sharraxay baaragaraafka sare waala dhimi ama diidi karaa:
1. Hadii: (a)kulanka barnaamijka waxbarashada la khaasyeelay(IEP) ee dhawaa kaasoo aad joogtay kahor ka saaristii ilmahaaga dugsiga dawliga ah, aanad wargelin kooxda IEP inaad diidanayd meelaynta ay soojeedisay SAU si loo siiyo ilmahaaga FAPE, oo ay kujiraan sheegista tabashadaada iyo talogalkaaga si aad ugu qorto ilmahaaga dugsi gaar ah kharashka dawladda; ama (b) Ugu yaraan10 cisho (ay ku jiraan wixii ciido ah ee dhacaya maalintaas) kahor saaritaankaaga ilmahaaga dugsiga dawliga ah, aanad siin wax qoraal ogaysiin ah SAU ee macluumaadkaas;
2. haddii, kahor kasaaristaada ilmahaaga dugsiga dawliga ah, SAU ay ku siisay ogaysiin qoran oo ka horreeyey, oo ah talogalkeeda ay ku qiimaynayso ilmahaaga (ay ku jirto bayaanka ujeedada qiimaynta taasoo ahayd mid haboon oo caqli gal ah), laakiin aanad u keenin ilmahaaga qiimaynta; **ama**
3. Marka la eego xaqiiqda maxkamadi hayso in tallaabooyinkaagu aanay macquul ahayn.

Si kastaba, kharashka magdhowgu:

1. Waa inaan loo yarayn ama loo diido ku hoobashada bixin ogaysiis darteed hadii: (a)dugsigu kaa horjoogsaday in lagu siiyo ogaysiiska; (b) Aanad helin ogeysiis masuuliyaddaada inaad bixiso ogaysiiska lagu sharraxay xaga sare; ama (c) Samaynta shuruudaha sare uu kadhalan karo dhaawac jidheed ilmahaaga; **iyo**
2. Go'aanka maxkamada iyo sarkaalka dhagaysiga dartood, inaan loogu yarayn ama loogu diidin guuldarrada waalidka inay bixiyaan ogaysiiska loo baahnaa haddii: (a) Waalidku aanu ahayn mid wax qora/akhriya ama uuna qori karin Ingiriisi: ama (b) Samaynta shuruudaha sare ay u dhaw yihiin inay ku keenaan ilmaha dhaawacyo nayadeed oo halis ah.

**Beddelka waalidka**
**34 CFR §300.519**
**Guud. (a)**
Wakaalad kasta oo dawli ah waa inay xaqiijisaa in xuquuqda ilmaha la ilaaliyey marka —
(1) Aan waalid (sida lagu qeexay §300.30) aan la tilmaami karayn;
(2) Wakaalada dawladdu, kadib dadaalo caqli gal ah, ay wayday waalid;
(3) Ilmaha uu ka masuul yahay Gobolku sida uu dhigayo sharciga Gobolkaasi; ama
(4) Ilmuhu aanu la socon dhalintyarta dhalinyarta ee guriga ah sida aynu lagu qeexay qaybta 725(6) ee McKinney-Vento Xeerka Kaalmada Bilaa Hooyga (42 U.S.C. 11434a(6)).

**Waajibaadka wakaaladda dawladda (b)**
Waajibaaadka wakaaladda dawladdu halka ka hoosaysa baaragaraaf (a) ee qaybtan ooy kujirto imtixaanka si qof matalo beddelka waalidka. Tan waa inuu kujiraa hab —
(1) Lagu go'aaminayo haddii ilme u baahan yahay beddel waalid; iyo
(2) U xilsaarid beddel waalid ilmaha.

**Ka Masuul Noqoshada Gobolka (c).**
Xaaladda ilmaha Gobolku ka masuul yahay, beddelka waaIidka si kaduwan waxa laga yaabaa inuu magacaabo qaadiga la socda xaalada ilmaha, waxa shardi ah in waalid beddeluhu uu buuxiyo shuruudaha baaragaraafka (d)(2)(i) iyo (e) ee qaybtan.

**Shuruudaha xulashada beddelaha waalidka (d)**
(1) Wakaaladda dawladdu waxay ku dooran kartaa beddelka waalidka hab kasta oo waafaqsan sharciga Gobolka.
(2) Wakaaladaha dawladdu waa inay hubiyaan in qofka loo soo doortay beddel waalid —
  (i) Aan ahayn shaqaale SEA, LEA, daryeelbixiye EIS ama wakaalad kale oo siisa adeegyada kahortagga hore, caafimaadka, daryeelka, ama adeegyom kale ilmo ama xubin qoyska ilmaha ah;
  (ii) Uuna lahayn dan shaqsiyadeed ama xirfadeed taasoo ka hor imanaysa danta ilmaha ee beddelaha waalidka u matalayo; iyo
  (iii) Uu leeyahay aqoon iyo xirfad taasoo uu ku xaqiijiyo matalaad ku filan ilmaha.

**Shuruudaha qofka aan shaqaalaha ahayn; magdhaw (e)**
Qofka u qalma inuu noqdo beddel waalid marka baaragaraaf (d) ee qaybtan ma aha shaqaale wakaaladeed oo kaliya maxaa yeelay waxa guneeya wakaaladda si uu ugu adeego beddel waalid.

**Dhalinyarta bilaa cidda iyo bilaa guriga ah (f)**
Xaaladda ilme kaasoo ah dhalinyarta bilaa cidda iyo bilaa guriga ah, shaqaale habboon ee guryaha gurmadka ah, guryo ku meel gaadh ah, barmaamijyo nololeed ee madaxabannaan, barnaamijyada gaadhista sakadaha waxa loo magacaabi karaa beddel waalid oo ku meel

gaadh ah iyadoon la tixgalinayn baraagaraaf (d)(2) ee qaybtan, ilamaa beddelka waalid la magacaabi karo kaas oo buuxiya dhamaan shuruudaha baaragaraaf (d) ee qaybtan.

**Masuuliyadaha beddelka waalidka (g)**
Beddelka waalidku wuxuu u matali karaa ilmaha dhammaan arrimaha la xidhiidha—
(1) aqoonsiga, qiimaynta, iyo meelaynta waxbarashada ee ilmaha; iyo
(2) siinta FAPE ilmaha.

**Masuuliyada SEA (h)**
SEA waa inay samaysaa dadaalo caqli gal ah si ay u hubiso in u xilsaaridda beddelka waalid aanay kabadan 30 cisho kadib marka wakaaladda dawladdu ay go'aamiso in ilmuhu u baahan yahay beddelka waalid.

**Wareejinta xuquuqda waalidnimo da'da qaan-gaadhka.**
**34 CFR §300.520**
**Guud (a)**
Gobolka ayaa bixin kara midaas, marki canug naafo ah uu gaaro qaangaar ayadoo loo egaayo sharciga gobolka(da'da 18 ee Maine) taasoo khuseysa dhamaan ciyaalka(marki laga reebo canug naafo ah loo go aamiyay inuusan waxba awoodin sharciga Maine hoostaga)

(1) (i) Wakaaladda dawladdu waa inay siisaa wixii ogeysiis looga baahan yahay qaybtan ilmaha iyo waalidkaba; iyo
(ii) Dhammaan xuquuqda loo oggolaaday waalidka marka la eego Qaybta ee B ee Xeerka wareejinta ilmaha;
(2) dhammaan xuquuqda loogu oggolaaday waalidka ee hoos imanaya Qaybta B ee Xeerka wareejinta carruurta kuwaas oo lagu xabisay iyadoo dad waaweyn ama kacaan ah, Gobolka ama xarun dhaqan celineed oo deegaanka ah; iyo
(3) Mar kasta oo Gobol bixiyo wareejinta xuquuqda ee hoos imanaysa qaybatan iyadoo la raacayo baaragaraaf (a)(1) ama (a)(2) ee qaybtan, waa in wakaaladu ay ogaysiisaa ilmaha iyo waalidkaba xuquuqda gudbinta.

**Xukun gaar ah (b)**
Gobolku waa in uu hirgaliyaa hab-raacyo loo magacaabayo waalidka ilmaha naafada ah, ama, haddii aan waalidka la helayn, qof kale oo habboon, si uu u matalo danaha waxbarasheed ee ilmaha gabi ahaan wakhtiga mutaysiga ilmaha ee hoos yimaad Xeerka Qaybta B haddii, si uu dhigayo sharciga Gobolku, ilmaha gaadhay da'da qaan-gaadhka , laakiin aan la go'aamin inuu yahay mid laga dhaafay, waxa la go'aamin karaa in aanu lahay awoodda uu ku bixin karo oggolaansho iyadoo la eegayo barnaamijka wabarasheed ee ilmaha.